

Taageerista Bulshada Rayidka ah iyo Ururada Xuquuqda Haweenka ee Goobaha Nugul ee Khilaafku Saameeyey

Warbixinta Somalia¹

1. Hordhac

Iyaga oo qayb ka ah daladda ururada xubnaha ka ah Hawlgalka Jinsiga ee Nabadda iyo Amaanka (Gender Action for Peace and Security (GAPS), oo ay ka mid yihiin Haweenka u taagan Haweenka Caalamka (Women for Women International), Xarunta Haweenka ee Nabadda Aduunka (Women's International Peace Centre), Ururka Caalamiga ah ee Haweenka ee Nabadda iyo Xorriyadd ee Nayjeeriya (Women's International League for Peace) iyo Xorriyadda Nayjeeriyo iyo Haweenka Aduunka (Freedom Nigeria and Womankind Worldwide), waxa ay Saferworld iyo Xarunta Horumarinta Haweenka Soomaaliyeed (Somali Women Development Center) ay sameeyeen qiimayn ku saabsan caqabadaha iyo fursadaha ay wajahaan ururada xuquuqda haweenka iyo ururada kale ee bulshada rayidka ah ee ka shaqeeya arimaha la xidhiidha haweenka, nabada iyo amaanka Somalia. Sidoo kale daladdu waxa ay qiimayn ku samaysay ururada xuquuqda haweenka iyo ururada bulshada rayidka ah ee gobollo kala duwan oo ku yaal Suudaanta Koonfureed iyo Nayjeeriya. Ujeedada u wayn ee laga leeyahay qiimaynta iyo wada tashigu waxa ay tahay in la barto ururada haweenka iyo ururada bulshada rayidka ah ee kala duwan khibradahooda, caqabadaha ay wajahaan iyo fursadaha ay haystaan islamarkaana in loo soo jeediyoo taloooyin deeq bixiyayaasha ka shaqeeya dalalkas si ay si fiican ula sameeyaan iskaashi oo ay u taageeraan.

Wadar guud oo ah 71 urur ayaa qiimayn lagu sameeyey Somalia, si loo ogado kuwa ay yihiin ururada ka shaqeeya haweenka, nabadda iyo amaanka, nooca lacagaha deeqaha ee ay helaan, halka ay ka shaqeeyaan, waxyaalahay ay awoodda saaraan iyo cidda ay yihiin bartirmaameedkoodu.

25 urur oo kale (13 ururo xuquuqda haweenka ah iyo 12 ururo bulshada rayidka ah) ayaa loola tashaday xog bixiyayaal ahaan muhiim ah darteed, kuwaas oo ka shaqeeya maamul goboleedyo kala duwan: afar Puntland ah, afar Jubaland ah, shan Koonfur-Galbeed ah, laba Hirshabeelle ah, sadex Galmudug ah iyo todobo maamulka gobolka Baandir ah. Midna kama shaqeeyo dalka o dhan, balse badankoodu waxa ay ka shaqeeyaan dhawr maamul goboleed oo Soomaaliya ah. Laba ayaa u diiwaangashan dalad ahaan, halka badankoodu (23) ay u diiwaangashan yihiin urur ahaan.

Xarunta Horumarinta Haweenka Soomaaliyeed (Somali Women Development Centre, oo loo soo gaabiyo SWDC) waxa ay fullisay hawl lagu ogaanayoo xaaladda ururada xuquuqda haweenka iyo ururo bulshada rayidka ah oo tiradoodu dhan tahay 71, kuwaas oo ka jira Soomaaliya iyada oo waraysiyada iyo shirarka loogu qabtay aaladda interneetka ku xidhiidhsan (virtual). Hoos waxa ku qoran waxyaabihii ugu muhiimsanay ee kaa soo baxay wareysidaa, iyada oo la eegayo meelaha ay deggan yihiin, meelaha ay ka shaqeeyaan, lacagaha soo gala inta ay leeg yihiin iyo nooca ay yihiin, iyo mawduucyada iyo bartirmaameedyada ay awoodda saaraan kuwa ay yihiin.

¹ This report was finalized in November 2020. It was written by Mohamed Ali Gure, research consultant for SWDC, and Julia Poch Figueras and Diana Trimiño Mora from Saferworld, with the support of Amina Arale from SWDC, who also conducted the data collection, and Hannah Bond and Eva Tabbasam from GAPS who reviewed the report. A special gratitude to colleagues from SWDC and Saferworld who have also contributed to this research and report: Khadija Ahmed (SWDC), Leena Patel, Alastair Carr, Sara Torrelles and Lewis Brooks (Saferworld).

Gobolka Banaadir ayay ururada haweenka iyo ururada bulshada rayidka ah ay ugu badan yihii tiro ahaan (25%), waxa ku xigga Puntland, Jubaland iyo Koonfur-galbeed. Ururadu waxa ay ku badan yihii oo intooda badani joogaan magaaloo yinka waawayn ee dawlad goboleedyada waaweyn, iyaga oo ku yar maamul goboleedyada dhowaan dhaladka ah sida Galmudug iyo Hirshabeelle. Sadex urur keliya ayaa ururadii la gaadhay ka shaqeeya heer qaran (national level), inta kale waaxa ay ka shaqeeyaan hal ilaa afar gobol. Ugu yaraan 36% ururada waxaa hoggaamiya haween oo waa ururo ka shaqeeya xuquuqaha haweenka, halka inta kale ay ka shaqeeyaan arimaha guud ee banii-adantinimada, horumarka ama nabadaynta Wax inyar ka badan kala badh ayaa meeqaamkoodu yahay ururnimo (56), waxa soo raaaca 8 dalladood iyo isutegey (networks and associations), islamarkaana dhamaantood si rasmi ah ayay u diiwaangashan yihii.

Inkaa badan (29%) ururada bulshada rayidka ah ee lala tashaday waxa soo gala dakhli sanadeed ka badan \$501,000, boqolkiba 3% waxa ay ahaayeen ururo ka shaqeeya xuquuqda haweenka. Waxaa muhiim ah in la xuso inay tahay cel-celis ahaan dakhliga soo gala, oo waxa ay tahay in maanka lagu hayo in ururada bulshada rayidka ah dakhligoodu uu ka is-bedbedel badan yahay ururada caalamiga ah ee aan dawliga ahayn. Intas kadib, waxa jira tiro ururo ah oo dakhli sanadeedkoodu yahay ilaa \$20,000 ama inta u dhaxaysa \$21,000 iyo \$50,000 ama inta u dhaxaysa \$51,000 ilaa \$100,000. Inta soo hadhay (oo ah 11%) waxa ay helaan inta u dhaxaysa \$101,000 iyo \$500,000. Ururada lacagta u yar soo gasho waa kuwa u diiwaangashan isku-tag ahaan (associations) oo badankooda fadhligoodu yahay Jubaland iyo Puntland. Inta u badan ururadu (75%) waxa ay helaan lacago u gaar ah marshuucyo (project-specific funding), iyada oo 25% keliya ay helaan lacagta noocas ah. Laba urur keliya ayaa hela lacag joogto ah (core funding), labaduba waxa saldhig u ah gobolka Banaadir, midkood ayaa ah urur haween. 54% ururadu waxa ay helaan lacag (funding) mudo kooban ah (short-term), halka 36% ay helaan lacago mudo dheer ah (inkasta oo ay yihii kuwo marshuucyo u gaar ah), kuwaas oo badankoodu degan gobolka Banaadir. Lacagaha soo gala maaha kuwo kala duwan (diversification): ururada bulshada rayidka ah iyo ururada haweenku waxa ay ku tiirsan yihii lacago ka yimaadda deeq-bixiyayaasha (donors), Qaramada Midoobay, iyo ururada caalamiga ah iyo cidha ay iskaashiga leeyihiin (partners). Inta badan ururada xuquuqda haweenka ee la waraystay waxa ay sheegeen inay u baahan yihii tabareyn d iyo xirfadaha loo adeegsdao qaabka loo raadiyo maalgelinta.

Ururada intooda badani waxa ay ka shaqeeyaan xadgudubyada ka dhanka ah dumarka iyo hablaha, waxa ku xiga ka fal-cellinta xadgudunyada lidka ku ah aadamaninda iyo ka qaybgalkooda. Ku dhowaad kala badh ururradaasi waxa ay ka shaqeeyaan amaanka iyo caddaaladda. Inkasta oo tiro yari ka shaqeeyaan la dagaalanka xagjirnimada hubaysan, hal urur keliya ayaa ka shaqeeya nabadeynta. Ma jiro urur ka shaqeeya xadgudubyada loo geysto dadka laga tirade badanyahay. Intooda badan waxa ay la shaqeeyaan dumarka, inkast oo 14% ay la shaqeeyaan dumarka reer miyiga, dhalinyarada, hablaha iyo dumarka iyo hablaha naafada ah. 83% waxa ay la shaqeeyaan qaxoontiga iyo dadka dalka gudihiisa ku barokacay, halka 70% ay la shaqeeyaan dadka diin ahaan ama qoomiyad ahaan laga tiro badan yahay, kuwaas oo Soomaaliya inta badan looga jeedo qabiilada laga tiro badan yahay.

Soomaaliya ma ansixin Mucaahadada Dabargoointa Dhamaan Noocyda Takoorka ka dhanka ah Haweenka (Convention on the Elimination of All Forms of Discrimination Against Women, CEDAW), sidoo kale waxa ay ansixisay oo aanay saxeexin Baratakoolka laga dheegay Axdiga Afrika ee Xuquuqaha Adamha a iyo Dadyowga ee ku saabsan Xuquuqaha Haweenka Afrika “ee loo yaqaan Maputo Protocol” (the Protocol to the African Charter on Human and Peoples’ Rights on the Rights of Women in Africa: Maputo Protocol). Sidoo kale Soomaaliya welli ma dejin Qorshe Hawleedka Qaran ee Haweenka, Nabadda iyo Amaanka.

Intii cilmi baadhistan lagu gudo jiray waxaa la tilmaamay in caqabadaha jiraa ay yihii sinaan la’aan hellidda xuquuqaha iyo fursadaha ah oo ka dhex jirta ragga iyo dumarka ee dhinacyada bulsho, dhaqaale iyo siyaasadeed, iyo sidoo kale habab iyo dhaqamo jinsi oo eex ku dhisan oo mudnaanta dumarka ka siiya ragga taas oo ka jirta dhamaan heerarka kala duwan ee go’aan qaadashada. Warbixintii u danbaysay ee Soomaaliya waxa Warbixinta Qaramada Midoobay ee Horumarka Banii-aadamka ay sheegtay in aduunka oo dhan ay Somalia kaga jirto dalka 4aad ee ugu hooseeya xagga sinaan la’aanta, hada laguma darin Somalia qiimaynta caalamiga ah ee jinsiga.² Marka la eego xogta qaran ee ku saabsan Yoolka 5aad ee Yoolasha Horumar Waara (sinaanta jinsiga), dalku wuu

² UNDP (2012), ‘Somalia human Development Report 2012: Empowering Youth for Peace and Development’.

ku danbeeyaa bartilmaamedyada la xidhiidha jinsiga sida dabargoointa dhamaan noocyda takoorka iyo xadgudubyada ka dhanka ah haweenka iyo hablaha ee ka dhaca meelaha furan iyo meelaha gaarka ah ba, iyo sidoo kale xaqijinta in haweenku si buuxda oo waxtar leh arimaha uga qaybqaataan iyo in ay helaan fursado siman oo hogaamineed ee dhamaan heerarka go'aan qaadasho ee nolosha siyaasadeed, dhaqaale iyo tan guud.

Kadib markii la ansixiyay in loo qoondeeyo haweenka qoondo o dhan 30% doorashadii qaran ee 2017, 24% xildhibaanadii loo doortay Aqalka Hoose iyo 22% Aqalka Sare ayaa haween noqday.³ Inkasta oo ay tani tahay guul muhiim ah, qoondadii haweenka lama gaadhsii, islamarkaana haweenku weli way ku yar yihiin geedi-socodyada siyaasadeed iyo xafiisyada dawladeed, ee ay ka midka yihiin golaha wasiirada, hay'adaha sharcidejineed iyo kuwa maamulka ee dalka oo dhan. Wuxuu intaas dheer, qoondada kuma saleysna xeer ee waa wax hadda ururada haweenku ay u ololaynayaan in lagu daro dastuurka iyo in la gaadh siiyo tirada 30% doorashooyinka soo socda. Sinaan la'aantaas ka jirta metelaaddu way ka sii wayn tahay marka la eego dumarka danyarta ah iyo kuwa reer miyiga ah iyo kuwa ka tirsan kooxaha la faquuqo (marginalised groups), sida qabiilada laga tiro badan yahay iyo dadk dalka gudihiisa ku barokaca, ee dhamaan dawlad goboleedyad xubnaha ka ah dawladda federaalka ah ee Soomaaliya.

Caqabad wayn oo hortaal in haweenka Soomaaliya inay ku guulaystaan xuquuqahooda waa xadgudubyada ka dhanka ah haweenka iyo gabdhaha ee sida saraysa uga dhaca dalka. Sahanka Caafimaadka iyo Dadwaynaha Soomaaliyeed (The Somali Health and Demographic Survey (SHDS), oo la daabacay April 2020, wuxuu ku jirta xog culus: 11.9% dumarka iyo hablaha la guursaday ee da'doodu tahay 15 ama ka wayn waxa loo gaystay xadgudub jidheed, galmo ama mid nafeed 12 billood ee ka horeeyey xilligii waraysiga la qaaday.⁴ Wuxuu khatar gaar ahi haysataa dumarka iyo hablaha barokacay oo 38% dhacdooyinka la xidhiidha xadgudbyada ka dhanka ah haweenka iyo hablaha ee warbixintooda la soo gudbiyay dalka oo dhan waxa ay la xidhiidhaan dad dalka gudihiisa ku barokacay.⁵ Wuxuu intaas dheer, gudniinka fircooniha habuhu welli aad ayuu ugu badan yahay Somalia oo qiyaastu waxa tahay in 99.2% hablaha da'doodu tahay (15-58 sanadood) inay mareen gudniinkaas.⁶

Ururada haweenka iyo ururada bulshada rayidka ah waxa ay inta badan yihiin kuwa ugu horreeya ee ka jawaaba xiisadaha iyo xaaladaha degdegga ah, oo iyaga ayaaa joogga aagga ugu horreeya si loo horumariyo daryeelka bulshooyinka, iyo sida loo yarayn lahaa gacan ka-hadalka iyo xaaladaha kacsan, buuxinta meelaha ay baneeyaan dawladda dhexe iyo maamul goboleedyada marka ay si buuxda u maarayn kari waayaan xiisadaha. Wuxuu ay u leeyihiin aqoon aan cid kale u dhigmin duruufaha, kalsooni ayay bulshooyinku iyo hogaamiyayaashu ku qabaan, si fiican ayay u fahamsan yihiin arimaha ku lugta leh jinsiga oo dhan ee shida gacan ka hadalka iyo khilaafyada islamarkaana ka hor istaagga haweenka iyo hablaha xuquuqaha ay ku leeyihiin bulshooyinkooda.

Horumarka ku yimi dhowaan xaaladda amaan ee Badhtamaha iyo Koonfurta Somaaliya ayaa u abuuray fursado badan iyo inay si fiican u gaadhi karaan ururada xuquuqda haweenka iyo ururo bulshada rayidka ah ee heer qaran iyo deegaan inay ka shaqeeyaan sidii ay u daboolli lahaayeen baahiyaha degdegga ah ee bulshada, iyo sidii hoos loogu dhigi lahaa khilaafka isla markaasna loo kobcin lahaa xuquuqal insaanka iyo marin u hellidda caddaadda, kuwaas oo dhamaantood ah ajandayaasha muhiimka ah ee Haweenka, Nabadda iyo Amaanka. Aqoontooda aan ciddi la tartami karin iyo khibradda tobonaanka sanadood ah waxa ay awood u siisay inay noqdaan kuwo xisaabta ku darsadda ka dareenqabka khilaafka (conflict sensitive) iyo in is-bedel balaadhan oo jinsi in laga sameeyo arrimo dhaqan ahaan xasaasi ah, iyo hanaan haweenka iyo bulshadu ay hogaan ka yihiin.

Hay'ad dhisidda ka socota Somalia, fursadaha in la keeno is-bedel mudo dheer jira ee ay keentay doorashooyinka soo socda iyo doodaha siyaasadeed ee hada socda iyo fursadaha ku saabsan arimaha la xidhiidha dumarka, nabadda iyo amaanka ee ka jiran baarlamaanka iyo doodaha qaran, dhamaantood waa fursado muhiim u ah horumarinta xuquuqaha haweenka, kordhinta ka qaybgalka micno leh oo ay dumarku yeesho iyo dhisidda nabab loo dhan yahay oo ka dhalata Somalia.

³ Amnesty International (n.d.), 'Somalia 2017/2018'

⁴ Federal Government of Somalia (2020), 'The Somali Health and Demographic Survey', April. (<https://somalia.unfpa.org/en/publications/somali-health-and-demographic-survey-2020>)

⁵ UN Office for the Coordination of Humanitarian Affairs (2018), 'Somalia Humanitarian Needs Overview'

⁶ Federal Government of Somalia (2020), 'The Somali Health and Demographic Survey', April. (<https://somalia.unfpa.org/en/publications/somali-health-and-demographic-survey-2020>)

Waxa cilmi baadhista si wayn uga soo baxday, fursadaha iyo aaminaadda ah in ururada bulshada rayidka ah iyo ururada haweenku ay yihiin Daneeyaasha iyo fagaarayaasha ugu fiican ee hogaamin kara shaqada la xidhiidha arimaha Haweenka iyo Nabadda. Jiritaanka haween olooleeya, qareenno ah iyo hogaamiyayaal siyaasadeed oo haween ah waxa ay abuuraysaa fursado gaar ah oo ay u helaan ururada bulshada rayidka ah iyo ururada haweenka si ay uga faa'iidaystaan duruufta hada jirta oo ay u kobciyaan waxyabaha ay u aqoonsadeen ajendayaasha ugu muhiimsan ee dalku leeyahay: Kor u qaadista ka qaybgalka haweenka ee doorashooyinka soo socda; In lagu cadeeyo dastuurka qoondada haweenka ah ee ah boqolkiiba 30; U ololaynta in la dejiyo Qorsho Hawleedka Qaran ee Somalia ee ku saabsan Haweenka, Nabadda iyo Amaanka iyo; Horumarinta dib u habayn sharci oo lagu sameeyo meelaha muhiimka ah oo ay ka mid yihiin ansixinta Xeerka Dembiyada Galmada oo aan waxba laga bedellin.

Fursadahaas oo jira, hadana ka qaybgalayaashu waxa ay sheegeen caqabado waawayn oo ka hor istaaggaa horumarinta xuquuqaha haweenka iyo guud ahaan Haweenka, Nabadda iyo Amniga:

- Cilmi baadhista waxa ay muujisay sida qaabka lacagaha la hello u socdaan (funding trends) iyo ilaalinta degdegga ahi ay u hagaan inta badan ururada shaqadooda ku saabsan ka fal-cellinta xadgudubyada ka dhanka ah haweenka iyo hablaha, iyo ka fal-cellinta banii-adantinimo. Ka qaybgalayaashu waxa ay muujiyeen baahida loo qabo in deeq bixiyayaashu ay maalgeliyaan meelaha kale ee ka midka ah Haweenka Nabadda iyo Amaanka, sida ka hortagga khilaafka oo laga eego dhinaca jinsiga, nabad-dhisidda, ka qaybgalka haweenka iyo siyaasadda Haweenka, Nabadda iyo Amaanka, u doodista iyo dhisidda dhaq-dhaqaaqyo. Inta badan ka soo qaybgalayaashu waxa ay tilmaameen baahida loo qabo in lala yimaado hab isku dhafan oo lagu dejiyo barnaamijyada Haweenka, Nabadda iyo Amaanka halkii ay ka noqon lahayd marshuucyo mid waliba gaarkiisa u taagan yahay, oo ay ka noqon lahaayeen kuwo si kala gaar ah wax uga qabta ka hortagga gacan ka hadalka iyo is-bedel lagu sameeyo hab fekerka bulsho, bixinta adeegyadda (oo ay ku jiraan ka falcellinta xadgudubyada ku sallayan jinsiga), awoodsiinta haweenka iyo ka qaybgalka. Kuwaasi waxa ay u baahan yihiin inay wax ka qabtaan hab fekerada bulsho iyo jinsi iyo arimaha kale ee keena khilaafka iyo takoorka iyada oo la xoojinayo hellidda adeegyada aasaasiga ah, si arimaha la xidhiidha xuquuqaha haweenka iyo hablaha iyo sinaanta jinsiga wax looga qabto qaab isku dhafan oo heer walba ah.
- Caqabadaha u waawayn ee dhibta ku ah haweenka iyo hablaha Soomaaliya ee ka qaybgalayaasha cilmi baadhstu tilmaantay waxa ay ahayd adeegyada dhawritaanka oo aan ku fillayn iyo habka nidaaminta oo daciif ah, gaar ahaan sharciga iyo marin u hellidda caddaaladda oo aan loo sinayn. Ururada lala tashaday waxa ay dareen gaar ah siiyeen sida bixinta adeegyadaasi ay u noqon karaan hanaan waxtar leh oo lagu gaadhi karo natiijooyin wax ku ool ah oo ay ashqaastu hellaan, balse arimahaas waxa ay tahay in lagu gaadho barnaamijyo leh saamayn habaysan oo laga shaqeeyey oo is-bedel qoto dheer ku samaysa waxyabaha sababa ee xididata u ah arimahaas, taas oo ay ka mid tahaay in la xaqijiyo fal-cellin ka timaadda jilayaasha iyo hay'adaha caddaaladda ee rasmiga ah iyo kuwa aan rasmiga ahayn (informal) ay noqdaan kuwo loo dhan yahay oo ka falcelliya baahiyaha iyo dalabaadka haweenka, hablaha iyo kooxaha la riixo (marginalised groups).
- Ururada bulshada rayidka ah iyo ururada haweenka ee lala tashaday, gaar ahaan kuwa taageera barnaamijyada xudunta ay u tahay haweenka iyo habluhu, waxa ay xuseen caqabado kala duwan oo kala kulma inay helaan maalgelinta ay bixiyaan deeq bixiyayaasha caalamiga ah. Ka qaybgalayaashu waxa ay tilmaameen in marar badan deeq bixiyayaashu ay soo bandhigaan in la soo gudbiyo codsiyo (call for proposals), kuwaas oo aan si buuxda u waafaqsanayn hor-tebinta Soomaalida ee heer deegaan iyo qaran ama baahiyaha haweenka iyo bulshooyinka. Arimaha kale ee la tilmaamay in caqabad ku yihiin hellidda maalgelin waa: qaabka codsiyada loo gudbiyo (proposals) waa kuwa farsamadoodu u adag tahay oo ku qoran af shisheeye, hababka loo codsado maalgelinta oo kakan oo interneetka lagu diro (online) kuwaas oo aan la jaan qaadi karin caqabadaha ay la nool yihiin, codsiyada lagu baahiyaha jiritaanka maalgelinta la codsan karo oo aan si fiican loogu baahin heer qaran, iyo gaar ahaan heer deegaan iyo miyi, mudada u

cayiman in lagu gudbiyo oo aad u yar, codsiyada aan guulaysan oo aan la sheegin waxyaabaha lagu diiday, iyo gaabis ku jira awoodda shaqooyinka muhiimka ah.

- Sababo la xidhiidha habka loo bixiyo lacagaha deeqaha ah, hababka iyo lacagaha la bixiyo oo ku dhisan “marshuucyo. n”, caqabadda u wayn ee haysata ururada bulshada rayidka ah iyo ururada haweenka waa inay helaan lacag deeq ah oo aasaasi ah oo aan ku dhisnayn marshuuc, taas oo u ogolaanaysa inay dhisaan shaqooyin muhiim ah oo ururku leeyahay oo mudada dheer ah; inay shaqaalaysiistaan oo ay haystaan shaqaale xudun u noqda awoodda ururka, sida Kormeerka, Qiimaynta iyo Waxbarashada (MEL), maaliyadda, lacag raadinta (fundraising), waafaqidda iyo raacidda shuruucda iyo nidaamyada haboon, maamulka iyo hawlgellinta. Ka qaybgalayaasha lala xidhiidhay waxa ay sheegeen in inta badan deeq bixiyayaasha iyo ururada caalamiga ah ay ku shaqeeyaan fekerka ah in ururada bulshada rayidka ah iyo ururada haweenku aanay ‘awood’ u lahayn inay fuliyaan oo ay maareeyaan marshuucyo waawayn iyo inay maareeyaan lacago badan toonna, marka aan arinkaasi dhib ahayn – aragtidoodu waxa tahay in ururada qaarkood aanay welli lahayn aqoon ku saabsan habraacyada, siyaasadaha, nidaamyada iyo hababka gaarka ah ee deeq bixiyayaasha iyo ururada caalamiga ahi leeyihii, iyo in ay taas dheer tahay in gaabiska ku jira aqoonta ay keentay habka loo bixiyo lacagaha iyo hababka ay u shaqeeyaan.

Natijadu waxa ay cadaynaysaa in ay sax tahay oo loo baahan yahay in loo dhaqaaqo sidii loo deegaamayn lahaa oo awoodda loogu wareejin lahaa ururada bulshada rayidka ah iyo ururada haweenka ee Soomaaliya. Deeq bixiyayaashu waa inay u wajahaan lacagaha ay bixiyaan hanaan lagu abuurayo tabareynta ay Daneeyaaasha iyo ururada maxalliga ah u leeyihii inay si dhaqso ah oo mudo dheer ah wax uga qabtaan khilaafadka is-bedbelaya iyaga oo taageero siinaya deeqo hadba dhinac loo wareejin karo oo aan kakanayn iyo iskaashiyo deegaanka lala yeesho kuwaas u noqonaya xal waara xasilooni daradda, khilaafka iyo xiisadaha, halkii ay sii wadi lahaayeen in la maageliyo hadba marshuuc ururada caalamig u wadaan. Si fursadahaas looga faa’iidaysto, ururada haweenka iyo daladaha ololeeya waxa ay u baahan yihiin in taageerada caynkan ah kor loo sii qaadyo, in nidaamyada lacagaha deeqaha lagu bixiyo ee mudada dheer ah islamakaana la bedbedeli karo (flexibl) loo qoondeeyo ururada xuquuqda haweenka iyo ururada bulshada rayidka ah, ajadayaashooda iyo baahiyahooda la tilmaamay, in la yareeyo waajibaadyada looga baahan yahay ee culayska ku ah, shuruudaha adag iyo shuruudaha warbixinneed, iyo in la maalgeeliyo lacagaha aasaasiga ah iyo in la xoojiyo awoodooda oo lagu xidhiidhiyo hawlahu muhiimka u ah ee ay tilmaamaan ururada xuquuqda haweenka iyo ururada bulshada rayidka ah laftoodu.

Ka qaybgalayaashu waxa ay codsadeen in la dhiso tamartooda wax-qabad (capacity building) ku aadan meelaha muhiimka ah sida Kormeerka, Qiimaynta iyo Waxbarashada, raadinta Maalgelgelinta deeq bixiyayaasha, qaab dhismeedka maamul, qoridda qoraalada marshuuc raadinta, qorista warbixinada maaliyadeed iyo kuwa farsamo, shuruudaha deeq bixiyayaash, hanaanka ilaalinta shuruudaha la raaco, iyo maaraynta wax soo iibsashada. Haseyeeshee, waxa ay xuseen inaan awood dhisiddu noqon mid ku timaadda tabobar ku dhisan marshuuc, balse waa inay noqoto taageero deeq bixiyayaashu gaystaan oo aasaasi ah islamarkaana mudo dheer ah iyo inay noqoto mid ku dhisan iskaashi loo siman yahay oo ka yimaadda ururada caalamiga ah ee aan dawliga ahayn.

Cidha iskaashiga lala leeyahay ee caalamiga ah (Qaramada Midoobay iyo ururada caalamiga ah ee aan dawliga ahayn) waxa ay leeyihii door muhiim ah oo ay ciyaari karaan: inay maalgelin ku sameeyaan is-kaashi labada dhinacba ka socda, la siman yahay oo mudo dheer ah marka ay la shaqaynayaan ururada haweenka iyo ururada bulshada rayidka ah, in la isla qorsheeyo barnaamijyada iyo miisaaniyadaha, iyo sidoo kale hawlahu u doodis ee ka turjumaya mudnaanaha ururada aan dawliga ahayn ee heer qaran. Iyaga oo awoodda saaraya midnimada iyo iskaashiga, ururada caalamiga ah ee aan dawliga ahayn waa inay siiyaan fagaare ururada bulshada rayidka ah/ururad haweenka si ay u hogaamiyaan is-bedelka ay iyaga iyo bulshada ay la shaqeeyaan doonayaan inay arkaan.

Talooyinka

Talo soo jeedinta 1 - Fursado: Ururada bulshada rayidka ah iyo ururada haweenku waxa ay leeyihin khibrad, waana jilayaal maxalli ah oo leh aqoon mudo dheer soo jirtay oo ay nabadda u leeyihin si ay u taageeraan ka hortagga khilaafaadka gacan ka-hadlaka ku saleysan oo mudo dheer ah, islamarkaana xisaabta ku darsada arimaha jinsiga iyo dadaaladda Haweenka Nabadda iyo Amaanka. Khibradaasi waxa ay u baahan tahay in la aqoonsado oo la taageero iyada oo kor loo qaadayo hab maalgellineed oo aasaasi ah islamarkaana isbedbedelli karta, iyo in la xoojiyo awoodooda ku aadan meelaha ururka u muhiimka ah, si loo kobciyo Haweenka, Nabadda iyo Amaanka.

Horumarka amni ee dhowaan la gaadhayo iyo doodaha qaran ee ku saaban ka qaybgalka haweenka, waxa ay abuureen fursad aan hore loo arag oo u diyaarsan in laga fa'iidaysto. Si loogu awoodsiyo hogaanka ururada heer deegan iyo heer qaran, deeq bixiyayaashu waa inay kordhiyaan lacagaha ay siiyan ururada xuquuqda haweenka iyo ururada bulshada rayidka ah, oo waa inay ka dhigaan lacagaha kuwo si fudud loo helli karo oo aan kakanayn.

Waa inay sidoo kale mudnaanta siiyan u doodista qaran ee ay sameeyaan ururad xuquuqaha haweenka, ururada bulshada rayidka ah iyo daladaha ee ku aadan Haweenka, Nabadda iyo Amaanka – oo ay ka mid yihiin in la ansixiyo Qorshe Hawleed Qaran oo ku saabsan Haweenka, Nabadda iyo Amaanka, in haweenku si micno leh uga qayb qaataan go'aan qaadashada iyo ka-hortagga khilaafka (oo ay ka mid tahay in qoondada haweenka lagu daro dastuurka), marin u helidda caddaaladda iyo xuquuqda haweenka iyo habbla.

Talo soo jeedinta 2 – Mudnaanata, Arimaha laga shaqeeyo iyo nooca Lacagah deeqda ah:

Deeq bixiyayaashu waa inay kor u qaadaan taageerada ay siiyan arimaha mudnaanta leh ee Haweenka, Nabadda iyo Amaanka ee aan lacag ku filan loogu deeqin. Tan waxa ka mid ah: barnamijyada marin u hellidda caddaaladda, ka qaybgalk micnaha leh ee haweenka, ka-hortagga khilaafaadka gacan ka-hadalka ku saleysan iyo hababka la isku dhafay ee Haweenka Nabadda iyo Amaanka iyo sidoo kale xuquuqaha haweenka iyo habbla iyo siyaasadda iyo u doodista Haweenka, Nabadda iyo Amaanka. Deeq bixiyayaashu waa inay sidoo kale u maalgeliyaan si sal balaadhan oo dhamaystiran xuquuqaha haweenka, barnamijyada ilaalinta iyo awoodsiinta iyo balaadhinta ajandaha Haweenka, Nabadda iyo Amaanka iyada oo la aqoonanayo xidhiidhka muhiimka ah ee ka dhaxeeya Haweenka, Nabadda iyo Amaanka iyo meelaha kale.

Maalgellintu waa inay noqtaa mid ku dhisan duruufaha deeganada ka jira oo ay sidoo kale noqoto mid la bedbedelli karo si ay uga jawaab celliso xaaladaha degdegga ah, u ogolaanaysa ururada inay ka jawaabaan baahiyaha degdegga ah iyo sidoo kale inay ka shaqeeyaan ka-hortagga khilaafaadka wata gacan ka-hadalka iyo wax ka qabashada waxyaalahi xididada ah ee sababa sinaan la'aanta jinsiga iyo khilaafka mudada dheer. Tani waa inay mudnaanta ka yeelato oo laga door bido mudnanaha kooban ee ay leeyihin deeq bixiyayaashu, oo ay tahay inay sidoo kale kala duwaan meelaha ay lacagta geliyaan si ay u soo dhaafaan ka falcellinta banii-aadantinimo iyo xadgudubyada ku dhisan jinsiga iyo lacagaha ilaalinta.

Deeq bixiyayaashu waa inay kor u qaadaan maalgelinta mudada dheer ah si ay u maalgeliyaan barnamijyada leh tayada wanaagsan, raadaynta iyo waaraitaanka. Waxa inahaas dheer, waa inay ku jirtaa ugu yaraan 10% oo loogu tallo galo in lagu taageero horumarinta ururka, loogu taageero ururada haweenka iyo ururada bulshada rayidku si xoojiyaan shaqooyinkooda iyo awoodahooda muhiimka ah. Ururada haweenka iyo ururada bulshada rayidka waa in loo ogolaado inay fuliyaan mudnaano ay iyagu qorsheystaan, kuwaas oo inta badan wajahaya arimo kala duwan, halkii ay ku eekaan lahaayeen kuwo ay u soo dejijeen deeq bixiyayaashu, gaar ahaan dal sida Somalia oo kale ah oo sababo la xidhiidha mudnaanaha la siiyay ka-hortagga xagjirinimada hubaysan iyo istiraajiyadaha la dagaallanka argagixisnimada deeq bixiyayaashu waxa ay shuruudo ku xidhaan ajendayaasha ururada haweenka iyo ururada bulshada rayidka ah.

Talo soo jeedinta 3 – Is-kaashi siman (Equal partnerships):

Ururada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah waa inay dhisaan hanaan iskaashi oo ku sallaysan mabaadii'da midnimada iyo iskaashiga oo ay la yaashaan ururada bulshada rayidka ah/ururada aan dawliga ahayn, iyaga oo dhisaya iskaashi laba dhinac ka socda, loo siman yahay, isqadarin ku dhisan oo leh ka go'naansho oo lala yesho

ururada bulshada rayidka ah/ururada haweenka iyo in awoodda la saaro xoojinta awoodda urur weliba leeyahay iyo in la siyo ururada bulshada rayidka ah/ururada haweenka fursad ay k hogaamiyaan is-bedelka ay iyaga iyo bulshada ay la shaqeeyaan doonayaan inay arkaan.

Si taas loogu guulaysto, ururada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah waa inay maageliyaan is-kaashiga mudada dheer ah oo ay la yimaadaan ka go'aanshaha ay u baahan tahay, kaas oo ay tahay inuu soo dhaafo marshuucyada gaarka ah, oo waa inay taageeran koritaanka ururo bulshada rayidka ah oo xoogan, firfircoo oo madax-banaan oo metela fekerka dadka uu saameeyey khilaafka, iyo inay u doodaan xuquuqohooda iyo danahooda. Habkani wuxuu keensanaya in la wada qorsheeyo dhamaan barnaamijyada iyo miisaaniyadaha, siinta khayraad maaliyadeed ururada aan dawliga ahayn ee heer qaran si ay urur ahaan aay ugu horumaraan, in la fudaydiyo inay helaan lacago deeq ah oo toos ah iyo in la xaqiijiyo in barnaamijyadu ay ka fal-celiyaan is-bedelada ay u aqoonsaden in loo baahan yahay

Talo soo jeedinta 4 – Xoojinta awoodda (Capacity Strengthening):

Xoojinta awooddu [aqoonta] waa inay noqotaa mid ku qotonta meelaha ay tilmaameen ururada bulshada rayidka ah/ururada haweenka. Deeq bixiyayaashu waa inay kor u qaadaan taageerada si loo xoojiyo awoodda ay leeyihiin ururada bulshada rayidka ah iyo ururada haweeenku, gaar ahaan arimaha ku saabsan shaqooyinkooda muhiimka ah sida khayraadka lagu abaabulo wax iyo lacag raadinta (fund raising), maaliyadda, qorshaynta barnaamijyada iyo horumarka, hawlgeellinta iyo waafaqidda nidaamyada iyo Kormeerka, Qiimaynta iyo Waxbarashada.

Tan waxa loo samayn karaa iyada oo si toos ah loo maagelinayo hawla muhiimka ah iyo sidoo kale in lagu daro lacagaha mashruuca xoojinta awoodda [ururka] oo ka turjumaysa qimayn iyo mudnaan dejin ay hogaankeeda leeyihiin ururada haweenka iyo ururada bulshada rayidka ah laftoodu.

Deeq bixiyayaasha iyo ururada caalamiga ah ee aan dawliga ahayn waa inay u qoondeeyaan lacagaha mahudhaanka u ah, shaqaale iyo habab lagu dejiyo mudnaanaha xidiidho mudada dheer ah oo lala yeesho ururada bulshada rayidka ah iyo ururada haweeenka iyo in la taageero hurmarkooda ururnimo iyada oo la xoojinayo awoododa si ku dhisan waxyaabaha ay iyagu tilmaameen inay u baahan yihiin.

Talo soo jeedinta 5 – Helintaanka/hababka codsiyada mashaariicda loo gudbiyo:

Deeq bixiyayaasha iyo hay'adaha dawladaha badan ku jiraan waa inay uga dhigaan deeqaha sida tooska ah loo bixio kuwo ururada haweenka iyo ururada bulshada rayidka ah ee Somalia ay helli karaan oo ka turjumaysa qaab dhismeekoda iyo baahiyaha ay qabaan, oo waafaqsan ka go'anaanshaha caalamiga ah ee ku aadan Haweenka, Nabadda iyo Amaanka sababta oo ah ururada qaran ee haweenka iyo kuwa bulshada rayidka ah waxa ay leeyihiin waayo-aragnimo duruqsan iyo aqoon ku aadan duruufaha maxalliga ah oo ay kaga fican yihiin ururada caalamiga ah ee aan dawliga ahayn.

Deeq bixiyayaashu waa inay tixgellin siyaan inay bartirmaameedsadaan ururada haweeenku/ururada bulshada rayidka ah oo ay dejinayaan marshuucyo gaar ah, iyo inay fudaydiyan habka lagu soo gudbisto codsiyada marshuucyada, qaabka qoran ee la raaco iyo shuruudaha, iyo sidoo kale inay u xoojiyaan si joogto ah aqoonta ururada bulshada rayidka ah iyo ururada haweeenku u leeyihiin hababka iyo nidaamyada lagu soo gudbiyo codsiyada marshuucyada.

Waa inay siiyan xog cad oo aan dib u dhac Lahayn oo ku saabsan habka loo raacayo codsiyada marshuucyada, cidda shuruudaha buuxinaysa iyo shuruuduhu waxa ay yihiin, iyaga oo xogtaas ku fidinaya heer deegaan, federaal iyo heer qaran iyo iyaga oo marinaya daladaha ururada bulshada rayidka ah iyo gudiyada Qaramada Midoobay, oo ay ku jiraan kuwa deggan meelaha ka baxsan gobolka Banaadir (Muqdisho). Deeq bixiyayaashu waa inay siiyan ugu yaraan ogaysis 4 todobaad ah oo uu ku dhacayo xilliga codsiyada marshuucyada la soo gudbinayo, islamarkaana xogta waa in la fidiyo ka hor xilgaa daabacaadda.

Ururadda caalamiga ah ee aan dawliga ahayn waa inay ogaadaan doorkooda labada dhinac ah ee kala ah inay yihiin cid iskaashi lala leeyahay (partner) iyo deeq bixiye labadaba marar badan, oo waa inay talo soo jeedimahan ay ka dhigaan qayb ka mid ah qorshayaashooda barnaamijyada iyo hanaanka ay ku xushaan cidaha ay iskaashiga

Ia yeelanayaan, sidoo kale ururada caalamiga ah ee aan dawliga ahayn waa inay la wadaagaan cidda ay is-kaashiga la leeyihin xogta ku saabsan fursadaha lacagaha deeqaha ah si joogto ah oo aan dib u dhac lahayn, waana inay kobciyaan qorshanta marshuucyada oo laga wada qayb qaato iyo in loo dhaqaaqo is-kaashi mudo dheer ah.

Talo soo jeedinta 6 – raacista nidaamyad/talaabooyinka taxdar:

Deeq bixiyayaasha iyo ururada caalamiga ah ee aan dawliga ahayn waa inay yareeyaan oo ay is waafajiyaan shuruudaha taxadar ahaan loo qaato (due diligence requirements) iyaga oo u diyaarinaya hababka taxadar ahaan loo qaado iyo shuruudaha dejisan si la jaan qaadaysa awoodda ururada qaran ee bulshada rayidka ah iyo qadarka lacagta la soo codsaday, tusaale ahaan shuruudaha taxadar ahaan loo qaado ee laga rabo ururada bulshada rayidka ah/ururada haweenku waa inay ka yaraadaan kuwa ururada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah ee la tartamaya. Deeq bixiyayaashu waa inay maalgashadaan is waafajinta iyo qiimaynta awoodeed oo guud si loo xaqijiyo in ururada aan dawliga ahayn ee maxalliga ah iyo kuwa qaran aanay u buuxin shuruudo dhaadheer oo taxadar oo aan dhamaad lahayn. Deeq bixiyayaashu waa inay sidoo kale bixiyaan hanti u saamaxaysa ururada bulshada rayidka ah/ururada haweenka inay maalgashadaan shaqaale muhiim ah oo si fudud u buuxin kara talaabooyinka taxadar ahaan loo qaado iyo shuruudaha ay tahay in la waafaqo, gaar ahaan dal sida Somalia oo kale ah oo mudnaanta la siiyay ka-hortagga xagjirka hubaysan iyo istirjaajiyadaha la-dagaalanka argagixisadu ay xadidaan ururada haweenka iyo ururada bulshada rayidka ah ee Soomaliyeed inay hellaan lacago.

Talo soo jeedinta 7 – Qorista codsiyada mashaariicda (qoraalka farsamo iyo miisaaniyadda):

Deeq bixiyayaashu waa inay diyaariyaan habraac fudud oo lagu buux buuxin karo codsiyada mashaariicda, kuwaas oo si fudud oo dhaqso ah loo buuxin karo, si fudud loo heli karo luqadda uu ku qoran yahay iyo meelaha lagu faafiyo iyo ta ugu muhiimsan oo ah inuu yahay mid ka jawaabi kara baahiyaha haweenka iyo hablaha, ururada haweenka iyo bulshada, iyo sidoo kale inuu waafaqo istiraajiyadaha iyo siyaasadaha heer qaran/gobol, halkii uu ka noqon lahaa mid waafaqsan siyaasadaha iyo mudnaanaha deeq bixiyayha oo keliya.

Ururada bulshada rayidka ah iyo ururada haweenku waa inay awood u yeeshaan inay codsiyada mashaariicda u qoraan oo ku sar gooyaan baahiyaha bulshooyionka ama waa in lala tashado si loo xaqijiyo in codsiyadu yihiin kuwo waafaqsan baahiyahaas. In lacag loo qoondeeyo ururada qaran waxa ay sidoo kale taageero u tahay shaqooyinka socda iyo mudnaanaha ururada haweenka iyo ururada bulshada rayidka ah. Miisaaniyaddu waa inay tahay mid is-bedbedeli karta si ay u ogolaato in lagu daro qarashaadka dheeraadka ah iyo kuwa maamul ee ururada bulshada rayidka ah iyo ururada haweenka.

Talo soo jeedinta 8 – Kormeerka, Qiimaynta iyo Waxbarashada:

Deeq bixiyayaasha iyo ururada caalamiga ah ee aan dawliga ahayn wa inay mudnaan siiyan inay maageliyaan Kormeerka, Qiimaynta iyo Waxbarashada shaqaalaha ururada bulshada rayidka ah iyo ururada haweenka oo ay ka dhigaan shaqo muhiim ah oo joqtaysan, balse aanay ahaan oo keliya hawl “marshuucaysa”, iyo sidoo kale xoojinta Kormeerka, Qiimaynta iyo Waxbarashada guud ahaan shaqaalaha, balse inaanay ku eekaan uun ururinta iyo lafo gurista xogta oo lagu salleeysa qaababka iyo hababka deeq bixiyayaasha iyo ururada caalamiga ah ee aan dawliga ahayn.

Hanaanka Kormeerka, Qiimaynta iyo Waxbarashada ee hore ugu sii dejisanaa ururada aan dawliga ahayn/ururada haweenka waa in la siiyo mudnaanta, islamarkaana hanaan cusub waa in la qorsheeyaa iyada oo lala kaashanayo ururada aan dawliga ahayn/ururada haweenka. Barashada sida loo isticmaalo xogta Kormeerka, Qiimaynta iyo Waxbarashada ee loogu isticmaalo qorshaynta barnaamijyadu waa arin ay ururada bulshada rayidka ahi jeelaan lahaayeen inay ka helan taageero iyo khayraad badan.

Kormeerka, Qiimaynta iyo Waxbarashada waa inay waafaqsan tahay hanaanka/siyaasadda dawlada marka ay taasi waafaqsan tahay baahiyaha ururada haweenka/ururadad bulshada rayidka ah iyo bulshooyinka, waana in loo qabto hanaan laga wada qaybqaatay oo sidoo kale ay qayb ka yihiin dadka barnaamijayda ka faa'iidaysta (beneficiaries) iyo ka qaybgalayaasha barnaamijka. Wuxuu sidoo kale jira baahi loo qabo lacago la bedbedelli karo oo u yaal hadii wax dhacaan in loo qorsheeyo xaaladaha degdegga ah, sida COVID-19, oo lagu xidiidhiyo dadaaladda iyo lafo gurista Kormeerka, Qiimaynta iyo Waxbarashada.

Talo soo jeedinta 9 - Warbixinaha (kuwo maaliyadeed iyo kuwa farsamo (financial and narrative):

Deeq bixiyayaasha iyo ururada caalamiga ah ee aan dawliga ahayn waa inay dejijaan qaab qoraal dejisan oo halbeeg la raaco ah oo warbixinada oo dhan loo maro (maaliyad ahaan iyo farsamo ahaan) iyo habab la helli karo, daah-furan oo degdeg ah oo waraaqaha la gudbinayaa ay yar yihiin. Deeq bixiyayaasha iyo ururada caalamiga ah ee aan dawliga ahayn waa inay ka fekeraan sidii ay iskaga dayn lahaayen warbixinada billaha ah, oo ay ugu guuri lahaayeen warbixinno labadii sanadkii mar ah. Warbixinada sida loo soo dirayo waa in sidoo kale la fudaydin karo hadii laga dhigo hababka kale ee aan rasmiga ahayn sida telefoon lagu wada hadlo, shirarka ama booqashooyinka.

Deeq bixiyayaashu iyo ururada caalamiga ah ee aan dawliga ahayn waa inay cidda ay iskaashiga la leeyihiin ka taagraan inay helaan tabobarro ku saabsan shuruudaha iyo habraacyada ay deeq bixiyayaashu u rabaan in warbixinada loogu diro.

2. Talo soo jeedimo iyo cadayn (Evidence)

Talo soo jeedinta 1 – Fursado:

Ururrada bulshada rayidka ah iyo ururada haweenku waxa ay leeyihii khibrad islamarkaana waa jilayaal maxalli ah oo u leh aqoon mudo dheer soo jirta nabadeed, taas oo keeni karta in khilaafka looga hortaggo si waarta, mudo dheer jirta oo xisaabta ku darsata xaasaasiyadda jinsiga, waxa ay sidoo kale keeni kartaa xasilooni iyo dadaaladda Haweenka, Nabadda iyo Amaanka. Waxa loo baahan yahay in khibradan la aqoonsado oo la taageero iyada oo kor loo qaadayo hababka lacag bixineed ee aasaasiga ah islamarkaana la bedbedelli karo, iyo in la xoojiyo awooodohooda ku saabsan meelaha ururka muhiimka u ah, si loo kobciyo Haweenka, Nabadda iyo Amaanka Soomaaliya. Horumarka dhowaan laga sameeyey amaanka iyo sidoo kale doodaha qaran ee ku saabsan ka qaybgalka haweenku waxa ay abuureen fursad laga faa'iidaynsan karo oo mar la arag ah, taas oo u diyaarsan in laga faa'iidaysto. Si loo kordhiyo awoodda hogaanka heer deegaan iyo heer qaran, deeq bixiyayaashu waa in ay kor u qaadaan lacagaha ay siyaan ururada haweenka iyo ururada bulshada rayidka ah, waana inay ka dhigaan mid la helli karo oo la bedbedelli karo.

Waa inay mudnaanta siyaan ururada haweenka, ururada bulshada rayidka ah iyo daladaha ku hawlan u doodista ku saabsan Haweenka, Nabadda iyo Amaanka – taas oo ay ka mid tahay in la dejijo Qorshe Hawleed Qaran oo ku saabsan Haweenka, Nabadda iyo Amaanka, ka qaybgal micno leh oo ay haweenku ku yeeshaan go'aan qaadashada iyo ka-hortagga khilaafka (waxa ku jira in qoondada haweenka lagu daro dastuurka), marin u hellidda caddaladd iyo xuquuqaha haweenka iyo hablaha.

Taladan waxa loo soo jeediyay: Deeq bixiyayaasha, hay'adaha dawladaha badani ku jiraan, dawladda iyo bulshada rayidka ah.

Horumarka ku yimi xaaladda amni ee Badhtamaha iyo Koonfurta Soomaaliya waxa uu abuuray fursado badan iyo in si fiican loola shaqayn karo ururada heer deegaan iyo qaran ee bulshada rayidka ah iyo ururada haweenka si looga shaqeeyo daboolista baahiyaha dadka, nabad dhisidda iyo ka-hortagga khilaafka, iyo sidoo kale barnaamijyada ku saabsan Haweenka, Nabadda iyo Amaanka.

Hawlaha hada socda ee ay ka midka yihii doorashooyinka soo socda iyo dhismaha hay'adaha Somalia waa fursado aad muhiim ugu ah in kor loo qaado arimaha Haweenka, Nabadda iyo Amaanka Somalia. Dumarka Soomaliyed, ururada haweenka iyo daladuhu waxa ay si xoog ah ugu ololaynayaan in loo hello qoondo boqolkiiiba 30 ah doorashada soo socota ee 2021,⁷ islamarkaana waxa ay mudo dheer ku baaqayeen in qoondada haweenka lagu daro Dastuurka iyo sidoo kal Qorsho Hawleedka Qaran ee Somalia ee ku saabsan Haweenka, Nabadda iyo Amaanka. Waxa intas dheer, ururada haweenku waxa ay si aan kala joogsi lahayn ugu ololaynayeen in la ansixiyo Qabyo-qoraalka Xeerka Dembiyada Galmada, kaas oo kala kulmay caqabado waawayn Baarlamaanka (iyada oo nuqul wax laga bedely ay canbaareeyeen ururada heer deegaan, qaran iyo kuwa caalamiga ah).⁸

Cilmi baadhista waxa ka soo baxday dareenka ah inay jirto fursado ah doodaha Baarlamaanka ka socda ee ku saabsan Haweenka, Nabadda iyo Amaanka, iyo doodaha qaran ee socda. Ururada haweenka iyo ururada bulshada rayidka ah waxa ay aaminsan yihii inay yihii jilayaasha iyo fagaarayaasha ugu fiican ee hogaamin kara shaqooyinka dalka ka socda ee ku saabsan Haweenka, Nabadda iyo Amaanka.

Sidoo kale, aqoonta qotoda dheer ee ay u leeyihii deegaanka, iyo awoodda ay u leeyihin inay xisaabta ku darsadaan khilaafka iyo jinsiga (gender transformative) deegaan dhaqanku xaasaasi yahay, waxa ay dumarka iyo ururada bulshadu hogaamiso dhigaysa mawqif wanaagsan oo ay gal-daloolooyinka la tilmaamay ee ku saabsan

⁷ Reuters (2020), 'Somali women demand guarantee of 30% of parliament in 2021 election', October (<https://www.reuters.com/article/us-somalia-women-politics-trfn-idUSKBN27D1S9>)

⁸ Reuters (2011), 'Outrage as Somali parliament drafts law permitting child, forced marriages', August (<https://uk.reuters.com/article/us-somalia-women-rights/outrage-as-somali-parliament-drafts-law-permitting-child-forced-marriages-idUSKCN257200>)

Haweenka, Nabadda iyo Amaanka hore ugu qaadi karaan ajendayaashaas dalka Somalia. Dumarka badan ee olooleya, qareenada ah iyo hogaamiyayaasha siyaasadeed waxa ay keenayaan fursad aan hore loo arag oo ku saabsan arimaha Haweenka, Nabadda iyo Amaanka si loogu ololeeyo in dawladdu si buuxda u ansixiso Qorshe Hawleedka Qaran ee Somalia ee ku saabsan Haweenka, Nabadda iyo Amaanka iyo in la kobciyo dib u habayn lagu sameeyo ka-qaybgalka siyaasadda iyo xadgudubyada ku sallaysan jinsiga.

Haseyeeshee, waxa ay dareensan yihiin inay u labo-diblaysan yihiin caqabado lagu faah-faahin doono talo-soojeedimaha soo socda. Si fursadaha looga faa'iidaysto, ururada haweenka iyo daladaha u doodista sameeyaa waxa ay u baahan yihiin taageero cad oo bartilmaameed leh: lacago deeq ah oo mudo dheer socda islamarkaana aan kakanayn ee la bedbedelli karo, lacago si gaar ah loogu qoondeeyo ururada haweenka iyo ururada bulshada rayidka ah oo ku dhex jirta lacagaha guud ee deeqaha ah si kor loogu qaado ajandayaashooda iyo baahiyaha tilmaaman, nidaamyada ay waajibka tahay in la raaco iyo shuruudaha warbixineed oo culayskoodu yar yahay, iyo maalgellin lagu sameeyo lacagaha aasaasiga ah iyo xoojinta awoodooda oo ku xidhiidhsan shaqooyinkooda aasaasiga ah ee ay tilmaamaan ururada haweenka/ururada bulshada rayidka ah.

Cadaymaha gobolada

Banaadir waxa ay ka qaygalayaashu sheegeen in meelaha leh fursadaha waawayn ay tahay ka qaybgalka haweenka ee Barlamaanka iyo hogaaminta haweenka ee Haweenka, Nabadda iyo Amaanka, maadaama oo ay jiraan tiro sii kordhaysa oo ah haween firfircoon oo waxbartay oo ay ka mid yihiin qareeno bixin kara adeegyo sharci. Barnaamijyada ka-hortagga khilaafku waa inay ku baaqan in la xoojiyo ka mid ahaanshaha haweenka iyo qorshaynta arimaha Haweenka, Nabadda iyo Amaanka, fullinta iyo Kormeerista, Qiimaynta iyo barashada (MEL). Sidoo kale waa in la joogteeyo taageerada la siiyo ururada haweenka iyo ururada bulshada rayidka ah si ay u taageeraan bulshada, gaar ahaan waxa loo baahan yahay in la siiyo ururada haweenka/ururada bulshada rayidka ah taageerada naf badbaadinta ah.

Maamul goboleedka **Galmudug**, waxa ay ka qaygalayaashu tilmaameen kala duwanaansho dhaqan iyo qabiil, aqoon wanaag, wada shaqayn lagala yeesho xubnaha bulshada ka-hortagga khilaafka iyo gacan ka hadalka iyo in xidhiidh fiican lala yeesho waaxyaha dawladda ee heerarka kala duwan inay u yihiin fursado muhiim ah xoojinta shaqada nabad loo dhan yahay iyo arimaha haweenka, Nabadda iyo Amaanka.

Ka qaygalayaasha **Jubaland** waxa ay sheegeen in rabitaan ka yimaadda deeq bixiyayaasha oo ay ku maalgeliyan barnaamijyo u gaar ah jinsiga iyo xidhiidh wada shaqyneed oo lala yeesho dawladda heer qaran iyo maamul goboleed ay u tahay aasaas in ururada bulshada rayidka ah iyo ururada haweenku ay kor u qaadaan ka qaybgalka haweenka ee geedi-socodka siyaasadeed iyo dhamaan heerarka kala duwan e go'aan qaadashada.

Ka qaygalayaasha jooga maamul goboleedka **Puntland** waxa ay tilmaameen in dawladdu taageertay kor u qaadista tirada haweenka ganacsiga ku jira, dhallinyarada sidaaadka ah ugu fiican tiknoolajiyadda ayaa ka mid ah fursadaha ay helli karaan ururada haweenka/ururada bulsha rayidka ah si ay u buuxiyaan sinaan la'aanta hada jirta. Sidoo kale, wacyigellin bulsho oo ku saabsan haweenka iyo sinaanta wiilasha iyo hablaha, iyo xidhiidh wanaagsan oo ay yeeshaan bulshada martigelisa iyo dadka dalka gudihiiisa ku barokacay waxa ay abuuray fursad aan hore loo arag oo keeni karta in kooxaha la riixo laga qaybgelliyo arimaha.

Ka qaygalayaashii ka socday maamul goboleedka **Koonfur-Galbeed**; waxa ay sheegeen inay arimaha u fudayadinayo hadii bulshadu aqbasho iyaga oo adeegsanaya qaab-dhismeedka hogaamineed, hellitaanka Bulshada Caalamka oo doonaysa inay maalgeliyan mashaariicda, iyo xidhiidh wanaagsan oo lala yeesho dawladda.

Talo soo jeedinta 2 – Mudnaanaha/Waxyaabaha laga shaqaynayo/yo nooca Lacagaha deeqda ah:

Deeq bixiyayaashu waa inay kordhiyaan taageerada ay siiyan arimaha mudnaanta leh ee khuseeya Haweenka, Nabadda iyo Amaanka ee aan hada hellin maalgelin ku fillan. Waxa ka mid ah: barnaamijyada marinuhellidda caddaaladda, ka qaybgalka hufnaanta leh ee haweenka, ka-hortagga khilaafka iyo hababka isku dhafan ee Haweenka, Nabadda iyo Amaanka, iyo sidoo kale xuquuqaha haweenka iyo hablaha iyo siyaasadda iyo u doodista Haweenka, Nabadda iyo Amaanka. Deeq bixiyayaashu waa inay sidoo kale u maalgeliyaan hanaan dhamaystiran oo meelo badan laga egay barnaamijyada xuquuqaha haweenka, dhowrista iyo awoodsiinta, iyo inay balaadhiyaan ajandaha Haweenka, Nabadda iyo Amaanka iyaga oo aqoonsanaya xidhiidhka ka dhexeeya Haweenka, Nabadda iyo Amaanka iyo arimaha kale.

Lacagaha deeqaha ahi waa inay noqdaan kuwo lagu jaan gooyay hadaba duruufaha jira oo sidoo kale aan kakanayn ee la bedbedelli karo si ay uga fal-celiyaan xaaladaha degdeggaa ah, u ogolaadaan in ururuadu ay ka fal-celiyaan baahiyaha degdeggaa ah iyo sidoo kale inay ka shaqeeyaan ka-hortagga khilafka oo ay wax ka qabtaan arimaha xididada u ah ee keena sinaan la'aanta jinsi iyo khilaafka mudada dheer. Tan waa in la siiyo mudnaanta oo ay ka hormarto mudnaanaha kooban ee ay leeyihiin deeq bixiyayaasha oo ay tahay inay sidoo kale kala duwaan oo balaadhiyaan lacagaha si ay u soo dhaafaan ka fal-cellinta arimaha banii-adantinimo iyo xadgudubyada jinsiga ku sallaysan iyo lacagaha ilaalinta.

Deeq bixiyayaashu waa inay kordhiyaan lacagaha mudada-dheer socda si ay u maalgeliyaan barnaamijyada keenaya tayo wanaagsan, raadaynta leh ee waaraaya. Sidoo kale, waa inay ku jirtaa ugu yaraan 10% oo loo quondeeyo horumarka ururada si loo taageero ururada haweenka iyo ururada bulshada rayidka ah inay xoojiyaan shaqooyinka aasaasiga ah iyo awoodohooda. Ururada haweenka iyo ururada bulshada rayidka ah waa in loo ogolaado inay fuliyaan mudnaano ay iyagu dejisteen kuwaas oo inta badan wax ka qabta arimo kala duwan, halkii ay ku fooganaan lahaayeen kuwo ay dejyeen deeq bixiyayaashu.

Taladan waxa loo soo jeediyay: Deeq bixiyayaasha, hay'adaha dawladaha badani ka tirsan yihiin

Ururada cilmi baadhustani gaadhay waxa ay inta badan ka shaqeeyaan xadgudubyada jinsiga ku sallaysan, fal-cellinta banii'adantinimo iyo ka qaybgalka. Haseyeeshee, mararka ay meelo kale awoodda saaraan waxa ay u badan tahay inay u jaheystaan xagga deequhu u socdaan iyo mudnaanaha deeq bixiyayaasha halkii ay ka ahaan lahayd baahiyaha bulshada, mudnaanaha qaran ama urur, sida lagu sheegay xubinta hore.

Markii la waydiiyay meelaha ay tahay in mudnaanaha la siiyo xagga lacagaha deeqaha, ka qaybgalayaashu waxa ay sheegeen xuquuqaha iyo fursadaha oo aanay si siman u hellin haweenka iyo raggu dhinca bulsho, dhaqaale iyo siyaasdeed, hab fekerro bulsho iyo dhaqan oo eex ku dhisan kaas oo mudnaanta siiya ragga, hamaan heerarka go'aan qaadashada oo dhan. Wixa taas ku dhex jirta, in ka qaybgalayaasha cilmi baadhustu ay sheegen in caqabadaha u waawayn oo hortaagan haweenka iyo hablaha Soomaaliya ay yihiin adeegyada dhowrista oo aan ku filayn, nidaamka sharci oo liita, gaar ahaan xagga sharciga iyo u marin helidda caddaaladda oo aan loo sinayn. Ururada lala tashaday waxa ay carrabka ku adeekeen sida bixinta adeegyadaasi ay u noqon karaan hanaan waxtar leh oo lagu gaadhi karo mirodhil wax ku ool ah oo ay ashqaastu gaadhaan, balse arimahaasi waxa ay u baahan yihiin inay la socoto barnaamijyo ku yeelan kara saamayn joogtaysan dhalan rogista sababaha xididada u ah ee keena arimahaas, oo ay ka mid yihiin fal-cellinta daneeyaaasha iyo hay'adaha caddaaladeed ee dawladda iyo kuwa aan dawladda ahayn inay leeyihiin ka mid noqosho fiican iyo fal-cellin ku fiican daboolista baahiyaha iyo codsiyada haweenka, hablaha iyo kooxaha kale ee la riixo (marginalised groups).

Iyada oo taas laga duulayo, ka qaybgalayaasha badankoodu waxa ay tilmaameen baahida loo qabto in lala yimaado hanaan isku dhafan oo lagu wajaho barnaamijyada Haweenka, Nabadda iyo Amaanka, halkii laga samayn lahaa marshuucyo mid waliba gaarkiisa u taagan yahay oo ku aadan ka-hortagga gacan ka hadalka iyo bedelista hab-fekerka bulsho, adeeg bixinta (oo ay ku jiraan ka fal-cellinta xadgudubyada ku sallaysan jinsiga), awood siinta haweenka iyo ka qaygbalka. Kuwaasi waxa ay u baahan yihiin in wax laga qabto hab-fekerada bulsho iyo jinsi iyo waxyaalaha kale ee xididada u ah ee sababa khilaafka iyo takoorka iyada oo sidoo kale la

xoojinayo bixinta adeegyada aasaasiga ah, caddaaladda iyo ilaalinta. Wuxuu ay sheegeen in daladaha lacagaha deeqaha (funding consortiums) ama daladaha ururada bulshada rayidka ah/ururada haweenka ee ka shaqaynaya meelo kala duwan oo ku saabsan Haweenka, Nabadda iyo Amaanku inay abuuraan fursado iskaashi iyo horumarin siyyaadda Haweenka, Nabadda iyo Amaanka ee heer deegaan iyo qaran.

Ka qaygalayaashu wuxuu ay sidoo kale xuseen in aanay lahayn shaqaale muhiim ah oo aan ku xidhiidhsanay fulinta marshuuc balse u qaabilsan ka shaqaynta xoojinta lacag ururinta iyo dhisidda awoodooda maaliyadeed iyo awoodooda aasaaska u ah ururka, taasinay ay caqabad wayn ku tahay ururadu inay ka shaqeeyaan arimaha iyaga mudnaanta u leh iyo inay helaan maalgelin. Deeq bixiyayaashu waa inay kordhiyaan taageerada aasaasiga ah (core funding) ee ay siiyan ururada bulshada rayidka ah iyo ururad haweenka hadii ay doonayaan inay xoojiyaan awoodda ay u leeyihiin inay daboolaan baahiyahood, mudnaanaha tartamaya iyo inay ku guulaystaan awood si siman u dheelitiran oo ay yeeshaan ururada haweenka iyo ururada aan dawlighay ee caalamig ah ee ka shaqeeyaa Somalia, oo ay markas wax ku darsadaan dhismaha hanaan ugu danbaynta u saamaxa fagaare amaan ah oo ay ururada haweenka ee Somaalia ay ku hogamiyaan is-bedelka ay tilmaameen inay u baahan yihiin.

Ka qaygalayaashu wuxuu ay sidoo kale tilmaameen in lacagaha deeq bixiyayaasha ee mudada kooban ahi ay ku yihiin caqabad aad u wayn awoodda ururada iyo waaraataankooda, balse sidoo kale wuxuu ay caqabad ku yihiin tayada barnaamijyada, saameynlooda iyo waaraataankoodaba. Wuxuu aay codsadeen taageero maaliyadeed oo mudo dheer ah in la siiyo ururada haweenka, halkii laga bixin lahaa marshuucyo mudo kooban ah (3-6 bilood) oo aan keeni karin isbedel waara. Wax ay sidoo kale xuseen in deeqaha maaliyadeed ee la bixinayo ay ku jirto ugu yaraan 10% oo loo qoondeeyo horumarinta qaab dhismeedka urur iyo xoojinta awoodda shaqaalaha.

Meelaha kale ee dheeraadka ah ee taageerada laga siin karo Haweenka, Nabadda iyo Amaanka iyo ka qaybgalka haweenka oo micne leh waa in deeq bixiyayaashu inay ogaadaan oo ay shardi ka dhigaan in haween badan laga shaqaalaysiyo ururada aan dawlighay ee maxalliga ah iyo ururada bulshada rayidka, oo ay ku jiraan in laga shaqaalaysiyo jagooyin maamul iyo inay kormeer ku sameeyaan faraqa mushaharka haweenka iyo ragga u dhxeeyaa, siyaasadaha ilaaliya iwm.

Cadaymana gobolada

Ka qaygalayaashii ka socday **Banaadir** wuxuu ay xuseen in deeq bixiyayaashu ay aad u xiiseeyaan ka fal-cellinta banii'adantinimo, gaar ahaan xadgudubyada ku sallaysan jinsiga iyo dhowrista arimaha xuquuqal insaanka iyo helidda adeegyada aasaasiga ah sida daryeelka caafimaad. Ka qaybgale kale wuxuu xusay xallinta khilaafaadk. Mid ka mid ah ka qaygalayaashu wuxuu uu tilmaamay in meelaha gaarka ah ee la maagelinayo ay ku xidhan tahay danaha deeq bixiyaha iyo meelaha fursaduhu ku jiraan ee maaha baahiyaha dhabta ah ee ay dadku qabaan. Waxay sidoo kale ka hadleen in meelaha awoodda la saaro ay kala duwan yihiin ee aan la isku dhafin, taas oo aan ka turjumayn nolosha iyo baahiyaha dadka, islamarkaana waxay ay xanibtaa in la bixiyo adeegyo isku xidhan oo sal balaadhan ama barnaamijiyo isla socda oo la isla qorsheeyeye.

Maamul goboleedka **Galmudug**, ka qaygalayaashu wuxuu ay sheegeen arimo ay ka mid yihiin xadgudubyada ka dhanka ah haweenka iyo hablaha, ilaalinta iyo ka-hortagga khilaafka inay yihiin arimo ay u arkaan inay fududahay in la lacag looga hello deeq bixiyayaasha.

Maamul goboleedka **Hirshabeelle**, ka qaygalayasha ka socday wuxuu ay sheegeen inay fududahay in lacag loo helo arimo ay ka mid yihiin xadgudubyada ka dhanka ah haweenka iyo hablaha, ilaalinta iyo xallinta khilaafaadk. Wuxuu ay u aaneeyeen lacagaha loo helayo arimaha xadgudubyada ka dhanka ah haweenka iyo hablaha iyo ilaalinta, maqnaanshaha hay'ado dawladeed oo adag, gaar ahaan nidaamka caddaaladda iyo waaxda amaanka. Waxay intas dheer, xallinta khilaafka wuxuu loo maageliya sababta oo ah wuxuu jira khilaafyo qabiileed oo baahsan.

Ka qaygalayaasha ka socday maamul goboleedka **Koonfur-Galbeed** wuxuu ay tilmaamen in caafimaadka, nafaqada, ilaalinta, xadgudubyada ka dhanka ah haweenka iyo hablaha iyo xuquuqal insaanku inay yihiin meelaha ay fududahay in lacag loo helo. Nafaqada iyo caafimaadka wuxuu ay u arkaan inay yihiin hawlo naf badbaadin ah oo muhiim ah. Ka qaygalayaashu wuxuu ay xuseen in barnaamijyadaasi u dejisan yihiin hab kala qob-

qobnaan ah, oo waxa ay sheegeen in hadii la isku dhafi lahaa, barnaamijyadu waxa ay noqon lahaayeen adeegyo isku dhan oo balaadhn oo muhiim u ah daboolista baahiyaha haweenka iyo dadka ka badbaada xadgudubyada ku sallaysan jinsiga.

Maamul goboleedka **Puntland**, ka qaybgalayaashu waxa ay tilmaameen in xadgudubyad ka dhanka ah haweenka iyo hablaha, xallinta khilaafka, nabadaynta iyo awoodsiinta haweenku inay yihii meelaha si fudud loogu helo lacag. Xallinta khilaafka waxa loo geliyaa lacag sababta oo ah waa mid ku dhisan khayraad, islamarkaana qabiiladdu inta badan way dagaalamaan taas oo keenta dhimasho,, dhaawac iyo barokac. Mid ka mid ah ka qaybgalayaasha ayaa sheeegay in meelaha la geliyo lacagtlu ay ku dhisan yihii rabitaanka deeq bixiyaha ee aanay ka dhisnayn baahiyaha dadka, islamarkaana inkasta oo ay baahidii jirto, hadana beeq bixiyayaashu ma siiyan mudnaanta taageerada banii'adantinimo.

Ka qaybgalayaasha **Jubaland** waxa ay sheegeen inay fududahay in loo helo lacag arimaha ku aadan caafimaadka, nafaqada, hab nololeedka, xadgudubyad ka dhanka ah haweenka iyo hablaha, ilaalinta, xallinta khilaafka iyo nabad dhisidda.

Talo soo jeedinta 3 – Iskaashi la siman yahay (Equal partnerships):

Ururada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah waa inay sameeyaan hab iskaashi oo ku dhisan mabaadiida midhimad iyo wada shaqaynta ururada bulshada rayidka ah/ururada haweenka, iyaga oo dhisaya iskaashi laba dhinac ka soda, siman, isqadarin leh oo ka go'aansho la socdo oo lala yeesho ururada bulshada rayidka ah/ururada haweenka iyo in awooddla la saaro xoojinta awoodaha urur waliba leeyahay iyo in la siiyo ururada bulshada rayidka ah/ururada haweenka fagaare iyo fursad ay ku horkici karaan is-bedelka ay iyaga iyo bulshooyinka ay la shaqeeyaan doonayaan inay arkaan.

Si taas loogu guulaysto, ururada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah waa inay maalgeliyaan oo ay ka go'naansho u horaan iskaashi mudo dheer ah, oo ka fog mashruuc gaar ah, islamarkaana waa inay taageeraan bulsho rayid ah oo xoogan, firficoon oo madax-banaan oo metesha afkaarta dadka khilaafku saameyey, una dooda xuquuqahooda iyo danahooda. Habkani waxa uu u baahan yahay in la isla qorsheeyo barnaamijayda iyo miisaaniyadaha, in la siiyo taageero maaliyadeed ururada qaran ee aan dawliga ahayn si ay horumariyaan ururnimadooda, in la fudaydiyo inay si toos ah u heli karaan lacago deeqo ah, iyo in la xaqijiyo in barnaamijaydu ka fal-celiyaan is-bedelada ay ku tilmaameen in loo baahan yahay.

Taladan waxa loo soo jeediyay: Deeq bixiyayaasha, hay'adaha dawladaha badani ka tirsan yihii inay ururada caalamiga ah ee aan dawliga ahayn.

Ururada haweenka/ururda bulshada rayidka ah iyo daladuhu waa kuwa ugu wanaagsan ee fahmi kara waxna ka qaban karaan mudnaanaha bulshooyinka ay la shaqeeyaan, iyo hab fekerada jinsi iyo sinaan la'aanta ka horistaagta haweenka badqabka iyo ka qaybgalka. Waxa intaas dheer, waxa ay u leeyihiin aqoon xeel dheer duruufaha (inta badan iyagu waxa ay qayb ka yihii bulshada ay la shaqeeyaan), kalsooni iyo sida sahlan ee ay ula qabatami karaan arimaha, una bixin karaan adeegyo hanaan aanay dawladdu awood u lahayn inta badan, taas oo u ogolaanaysa inay buuxiyaan gal-dalolo muhiim ah xilliyyada xiisadaha iyo soo kabashada. Si dadaaladoodu u noqdaan kuwo waara ayna u xaqijiyaan xuquuqaha haweenka iyo ka qaybgalka haweenka, waxa ay u baahan yihii inay awood u yeeshaan bixinta iskaashi mudo dheer socda oo joogto ah iyo taageero ay la yeeshaan bulshooyinka ay la shaqeeyaan, iyad oo ay inta badan hogaminayso mudnaanaha ay dejisteen.

Intii ay socotay cilmi baadhristu, ka qaybgalayaashu waxa ay sheegeen in ururada caalamiga ah ee aan dawliga ahayn ay tahay in dejistaan dhaqamo isku mid ah, habab lacageed iyo nidaamyada la ilaaaliyo ee Kormeerka, Qiimaynta iyo Waxbarashada iyo shuruudaha warbixeeneed oo aan ahayn shuruudaha deeq bixiyaha caalamiga ah. Waxa ay ka hadleen lacago iyo xidhiidho "marshuucaysan", inay ka helaan tabobarro ururada aan dawliga

ahayn ee caalamiga ah si ay u buuxiyaan hababka ururadaas caalamiga ah iyo shuruudahooda warbixeeneed, halkii laga dejin lahaa dadaallo mudo dheer socda oo awood dhisidda oo ka turjuma baahiyaha iyo mudnaanaha ururda bulshada rayidka ah iyo ururada haweenka. Waa ay ka doodeen sida ururo badan oo aan dawli ahayn oo caalami ah aanay ula wadaagin qarashaadka aasaasiga ah (core costs), qarashyada dheeraadka ah ama maamul, taas oo dacifisa awoodood ururnimo. Waa ay ku baaqeen in ururada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah ay aqoonsadaan doorkooda labada dhinac ah ee mar ah cid iskaashi lala leeyahay (partner), marar badanna deeq bixiye, oo ay u dhaqaqaan jihada daah-furnaanta, iskaashi loo siman yahay oo mudo dheer ah oo ku dhisan midnimo.⁹

Ururada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah waa inay mudnaanta siiyan iskaashi laba dhinac ka socda, loo siman yahay oo mudo dheer jira oo ay la yeeshaan ururda bulshada rayidka ah iyo ururada haweenka marka ay la shaqaynayaan, inay isla qorsheeyaan barnamijyada iyo miisaaniyadda, inay si siman ula wadaagaan miisaaniyadda iyo qarashayada dheeraadka ah/maamul, iyo sidoo kale dadaaladda u doodista ee ka turjuma mudnaanaha ururada aan dawliga ahayn ee heer qaran. Agabka, hawlaha iyo hababka ay isticmaalaan ururada qaran ee aan dawliga ahayn waxa ay inta badan yihin kuwo duruufta ku sallaysan, waana in la siiyo mudnaanta, halkii laga abuuri lahaa mid ‘cusub’ ama lagu isticmaali lahaa habab ay hore u dejiyeen ururada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah. Waa intaas dheer, ururada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah waa inay xaqijiyaan inay siiyan khayraadka daruuriga u ah in la taageero horumarka ururada ay iskaashiga leeyihiin si ku dhisan mudnaanaha ay iyagu tilmaameen. Tani waa inay ku timaado qaab ah tabobarro, wax is waydaarsi aqooneed iyo khibrad ay u aqoonsadeen ururda bulshada rayidka ah iyo ururada haweenka inay yihin mudnaano iyo baahiyi, ama kuwo la wada dejiyay, iyo lacago la gelliyo hawlaha aasaasiga ah ee ururada. Si taas la mid ah, ururada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah waa inay sidoo kale qiimeeyaan meelaha ay awoodoodu gaabiska ka tahay oo ay fahmaan siyaalaha ciddaha ay iskaashiga la leeyihiin ay uga taageri karaan in laga xoojiyo, tusaale ahaan iyaga oo loo qabanayo tabobaro lacag lagu bixinayo. Shaqada caynkan oo kale ahi ma xoojinayso oo keliya ururada bulshada rayidka ah, balse sidoo kale waxa ay u saamaxaysaa cidda leh awoodda go’aan qaadashada ku saabsan barnamijyada loogu baahan yahay duruuf gaar ah in si siman la wadaago. Waa intaas dheer, waxa ay dhiirigelinaysaa inay ka turjunto qiimaha dheeraadka ah ee urur waliba leeyahay iyo inay wax ku biiriso hab xoogan oo dhisa xoogga ururada aan dawliga ahayn ee qaran iyo ururada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah.

Waa in mudnaanta la siiyo oo la taageero ajandayaasha ururada qaran ee aan dawliga ahan. Tani waa inay ka muuqaato heshiisaya iskaashi, hawlaha iyo miisaaniyadaha lala qorsheeyey ururada aan dawliga ahayn ee qaran ee iskaashiga lala leeyahay, iyada oo la aqoonsanayo aqoonta ay u leeyihiin duruufta iyo khibradooda. Ka qaybgalayaashu waxa ay sidoo kale sheegeen in taageerista/lacag siinta daladaha guud ama daladaha uruada bulshada rayidka ah/uruada haweenka ee ku foogaan arimo kala duwan oo ku saabsan Haweenka, Nabadda iyo Amaanku (iyada oo si gaar ah loo siinayo lacag ururda bulshada rayidka ah/ururada haweenka mid walba gaarkiisa) waxa ay kobcisaan wada shaqaynta ka dhaxaysa ururad bulshada rayidka ah ee dalka islamarkaana waxa ay qayb ka noqonaysaa in si waxtar badan leh loo kobciyo siyaasadda Haweenka, Nabadda iyo Amaanka ee heer deegaan iyo heer qaran.

⁹ Due to the sensitive nature of some of this content, the findings in this section have been aggregated and will not be presented by region.

Talo soo jeedinta 4 – Xoojinta aawoodda (Capacity Strengthening):

Xoojinta awooddu waa arrin ay tilmaameen ururrda Bulshada Rayidka ah/ururrada haweenku. Deeq bixiyayaashu waa inay kordhiyaan taageerada ay siiyan xoojinta awoodda ururrda Bulshada Rayidka ah iyo ururrada haweenka, gaar ahaan shaqooyinka aasaasiga ah sida hellida khayraadk iyo lacag ururinta, maaliyadda, qorshaynta iyo horumarinta barnaamijyada, hawlgeellinta, raacidda nidaamyada iyo Kormeerka, Qiimaynta iyo Waxbarashada.

Tan waa in la fuliyo iyada oo si toos ah loo siinayo taageero lacageed hawlaha aasaasiga ah, iyo sidoo kale in lagu daro xoojinta awoodda marshuucyada la maalgeliyo si ka jawaabaysa qiimaynta lagu sameyey awooddoda iyo mudnaan dejin ay hogaankeeda leeyihiin ururda bulshada rayidka ah/ururada haweenka laftoodu.

Deeq bixiyayaasha iyo ururrada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah waa inay u qoondeeyaan lacagaha mahuraanka u ah, shaqaale iyo habab si loo siiyo mudnaan xidhiidho mudo dheer socda oo lala yeesho ururrda bulshada rayidka ah/ururada haweenku iyo in la taageero horumarkood urur ahaan iyad oo la xoojinayo awooddoda si ku dhisn baahiyaha ay ururada bulshada rayidka ah laftoodu tilmaameen.

Taladan waxa loo soo jeediyay: Deeq bixiyayaasha, hay'adaha dawladaha badani ka tirsan yihiin iyo ururada caalamiga ah ee aan dawliga ahayn.

Ka qaybgalayaashu wax ay tilmaameen in deeq bixiyayaasha iyo ururada caalamiga ah inta badan ay ku shaqeeyaan aaminaadda ah inaan ururrada bulshada rayidka ah iyo ururrada haweenku aanay lahayn 'awood' ay ku fuliyaan iyo/ama maamulaan marshuucyo waawayn, xaaladdu se sidaas way ka duwan tahay. Arinku wuxa uu yahay ururada haweenka iyo ururada bulshada rayidka ah qaarkood aanay lahayn aqoonta habraacyada, siyaasadaha, nidaamyada iyo hababka deeq bixiyayaasha iyo ururada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah. Ka qaybgalayaashu waxa ay sheegeen inay door bidaan in loogu yeedho 'xoojinta awoodda' halkii laga odhan lahaa 'awood dhisid.'

Sababta oo ah lacaguhu waxa ay ku dhisan yihiin "marshuucyo", caqabadaha u waawayn ee soo foodsara ururrada deegaanada iyo kuwa heer qaran waa shaqaalaysiinta iyo haysashada shaqaale leh awood ay ku maamulaan hawlaha aasaasiga ah ee ururka, sida Kormeerka, Qiimaynta iyo Waxbarashada, maaliyadda, lacag ururinta iyo shaqooyinka aasaasiga ah (maamulka, hawlgeellinta). Marar badan, marka marshuuc dhamaado, shaqaalaha farsamo ee Kormeerka, Qiimaynta iyo Waxbarashada ama maaliyadda lama sii hayn karo oo way ka tagaan shaqada, tusaale ahaan.

Halkii marshuuc walba lagaga dari lahaa waajib awood xoojin, waxa muhiim ah in la maalgeliyo awoodda aasaasiga ah ee ururka si loo dhiso oo loo joogteeyo shaqaalaha farsamoyaqaanka ah ee muhimka ah oo jooga mudo ka badan inta marshuuc socio, in la taageero oo lagala shaqeeyo ururada bulshada rayikda ah/ururada haweenka inay xoojiyaan awooddoda muhiimka ah oo ay tilmaamaan meelaha ururada caalamiga ah ee aan dawlig ahayni ay ka kaabi karaan shaqadooda.

Ka qaybgalayaashu waxa ay codsadeen awood xoojin laga siiyo meelaha muhiimka ah ee barnaamijka, farsamada iyo sidoo kale meelaha qaab dhismeed sida Kormeerka, Qiimaynta iyo Waxbarashada, maamulka, lacag ururinta, qoritaanka codsiyada marshuucyada, qorista warbixinada maaliyadeed iyo farsamo, shuruudaha deeq bixiyaha, hababka loo raaco nidaamyada iyo maaraynta iibsiga alaabta (Procurement procedures) . Tan waa in loo taageero si joogto ah, ka hor qorista codsi marshuuc iyo inta lagu jiro fullinta marshuuca.

In loo guuro lacagaha deeqaha ee loo qoondeeyo meelaha aasaasiga ah (core funding) waxa ay u ogolaanaysaa ururada inay geliyaan lacagta meelaha ay tilmaanteen oo ay geliyaan meelaha urur waliba baahida u wayn u qabo. Xidhiidhada mudada dheer ee ay la socoto khayraadka ay deeq bixiyayasha iyo ururada aan dawliga ahayn ee caalamiga ahi u qoondeeyeen in lagu taageero ururada bulshada rayidka ah/ururada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah si loo xoojiyo awoodda ay u leeyihiin inay xaqijiyaan inay si buuxda wax ugu darsadaan is-bedelka ay iyaga iyo bulshooyinka degan meelaha ay ka shaqeeyaan ay doonayaan inay arkaan.

Cadaymaha gobolada

Ka qaybgalayaasha ka socday **Banaadir** waxa ay tilmaameen gaabis xagga awoodda ah oo ku saabsan qoritaanka codsiyada marshuucyada, warbixinada (kuwa maaliyadeed iyo kuwa farsamo), maaraynta maaliyadda, maaraynta miisaaniyadda, Kormeerka, Qiimaynta iyo Waxbarashada iyo shuruudaha ilaalinta habraacyada. Mid ka mid ah ka qaybgalayaashu waxa uu tilmaamay qiimayn lagu sameeyo awoodda ururadu inay tahay tallaabada koowaad ee lagu aasaasayo tabobarada loo baahan yahay iyo gaabiska jira ee xagga xirfadaha la xidhidha ka hor intaan la siin ururada bulshada rayidka ah awood xoojin. Sidoo kale, ka qaygale kale ayaa sheegay in ururadu u baahan yihiin inay helaan oo ay qortaan shaqaale aqoon leh oo qabta jagooyinka farsamo sida Kormeerka, Qiimaynta iyo Waxbarashada, lacag ururinta iyo maaraynta maaliyadda, kadibna waa inay qaataan tabobar lagu xoojinayo awoodooda. Intaas waxa dheer, in mid ah ka qaybgalayaashu uu tilmaamay in ilaalinta nidaamyada shuruudaha ah iyo qorista codsiyada mashaariicdu (proposal writing) ay yihiin meelo muhiim u ah xoojinta awooddsiinta.

Ka qaybgalayaash joogay maamul goboleedka **Galmudug**, waxa ay tilmaameen in qorista codsiyada mashaariicda, Kormeerka, Qiimaynta iyo Waxbarashada, maaraynta miisaaniyadda, hababka maaliyadeed, ilaalinta nidaamyada la raaco (due diligence) iyo horumarinta xirfaddu inay yihiin gaabisyada u waawayn ee u baahan in la xoojiyo. Sidoo kale, mid ka mid ah ka qaybgalayaashu wuxuu xusay in urukoodu uu leeyahay buugyaraayaasha/ talo-bixiyeyaasha daruuriga ah (manuals): maaliyadda, iihsiga, shaqaalaha iyo ilaalilnta caruurga balse ay u baahan yihiin in la cusboonaysiyo.

Ka qaybgalayaasha ka sodday **Hirshabeelle** waxa ay tilmaameen qorista warbixinada, Kormeerka, Qiimaynta iyo Waxbarashada, maaraynta miisaaniyadda, hababka maaliyadeed, iyo qorista codsiyada mashaariicda inay yihiin meelaha u baahan tabobarada, waxa ay sidoo kale sheegeen in ururada bulshada rayidka ahi ka wada qaybgalaan isla hal tabobar si ay u wadaagaan khibradda.

Ka qaygalayaasha ka socday maamul goboleedka **Jubaland** waxa ay tilmaameen qorista codsiyada mashaariicda, maaraynta miisaaniyadda, hababka maaliyadeed inay yihiin meelaha shaqaaluhu uga baahan yihiin tabobarro. Wuxuu qaygalayaasha uu tilmaamay marshuucyo gaar ah oo ku foogan dimoqraadiyadda, maamul wanaagga, xuquuqal insaanka iyo nabad dhisidda inay yihiin meelaha shaqaaluhu uga baahan yahay tabobar.

Ka qaybgalayaasha ka socday maamul goboleedka **Koonfur-Galbeeed** waxa ay tilmaameen qorista codsiyada mashaariicda, maaraynta miisaaniyadda, qorista warbixinada, Kormeerka, Qiimaynta iyo Waxbarashada, hababka maaliyadeed, ilaalinta nidaamyada la raaco (due diligence), u doodista, lacag ururinta iyo iihsiga alaabta. Wuxuu qaygalayaasha uu tilmaamay gaabis ku jira isku duwidda ka dhaxaysa ururada bulshada rayidka ah islamarkaana wuxuu ku talliyay in la sameeyo nidaam isku duwidda. Wuxuu qaygalayaasha uu tilmaamay maamulka iyo hal abuurnimada fikrardo ganacsi (entrepreneurship) inay yihiin meelaha u baahan horumarinta awoodda.

Ka qaybgalayaasha ka socday **Puntland** waxa ay tilmaameen qorista warbixinada, lacag ururinta, Kormeerka, Qiimaynta iyo Waxbarashada iyo maaraynta miisaaniyadda. Wuxuu qaygalayaasha uu tilmaamay maamulka iyo hal abuurnimada fikrardo ganacsi (entrepreneurship) inay yihiin meelaha u baahan horumarinta awoodda.

Talo soo jeedinta 5 – Hellintaanka/hababka codsiyada mashaariicda loo gudbiyo:

Deeq bixiyayaasha iyo hay'adaha dawladaha badani ku jiraan waa inay uga dhigaan ururdada haweenka iyo ururad bulshada rayidka ah lacagaha tooska ah kuwo si wayn looga heli karo Somalia oo u qaabayan hab la jaan qaadaysa qaab dhismeedkooda iyo baahiyahooda, islamarkaana waafaqsan ballan qaadka caalamiga ah ee Haweenka, Nabadda iyo Amaanka, sababta oo ah ururrada haweenka iyo ururrad bulshada rayidka waxa ay leeyihiin khibrad xoogan iyo aqoonta ay u leeyihiin duruufa oo ka wanaagsan tan ururrada caalamiga ah ee aan dawligh ahayn.

Deeq bixiyayaashu waa inay ka fekeraan inay si gaar ah u bartirmaameedsadaan ururrada haweenka/ururrada bulshada rayidka iyaga oo oo saaraya fursado lagu soo gudbisto codsiyo marshuuc oo gaar ah, islamarkaana fudaydinaya hanaanka codsiyada lagu soo gudbinayo, qaab qoraalka la raacayo iyo shuruudaha islamarkaana waa inay si joogto ah u xoojiyaan aqoonta ururada haweenka/ururada bulshada rayidka ah ee ku aadan qaab dhismeedka guud ee codsiyada, iyo hababka loo gudbiyo.

Waa inay siiyaan xog waqtii hore ah oo cad oo ku saabsan geedi socodka, shuruudaha la buuxinayo, islamarkaana waa in lagu baahiyi heer deegaan, federaal iyo qaran iyo in la mariyo daladaha bulshada rayidka ah iyo gudiyada Qaramada Midoobay, oo ay ka mid yihiin kuwa degan meelaha ka baxsan gobolka Banaadir (Muqdisho). Deeq bixiyayaashu waa inay siiyaan ugu yaraan 4 todobaad oo ogaysiis ah ka hor mudada ay dhacayso codsi soo gudbisashadu islamarkaana baahinta waa in la sameeyo daabacaadda ka hor.

Ururada aan dawligh ahayn ee caalamiga ah waa inay aqoonsadaan doorka labada dhinac ay ee ah inay yihiin cid iskaashi lala leeyahay iyo sidoo kale deeq bixiye, oo waa inay ku daraan talo soo jeedimahan qorshaynta barnamijyadooda iyo hanaanka xulashada cidaha ay iskaashiga la yeelanayaan, sidoo kale ururrada aan dawligh ahayn ee caalamiga ah waa inay xogta ku saabsan fursadaha maalgelinta ula wadaagaan cidaha ay iskaashiga leeyihiin si joogto ah oo dhaqso ah, iyaga oo kobcinaya in loo qorsheeyo barnaamijyada hanaan laga wada qayb qaatay oo u guuraan iskaashiga mudada dheer ah.

Taladan waxa loo soo jeediyay: Deeq bixiyayaasha, hay'adaha dawladaha badani ka tirsan yihiin iyo ururada caalamiga ah ee aan dawligh ahayn.

Ururada lala tashaday waxa ay xuseen dhibaatooyinka ay kala kulmaan inay ka helaan lacago deeq bixiyayaasha caalamiga ah. Inta badan ururdada haweenka/ururad bulshada rayidka ahi waxa ay sheegeen inaanay ka helin xog ku filan hababka codsiyada mashaariicdu ay u shaqeeyaan iyo sida loola xidhiidho deeq bixiyayaasha. Arinkan waxa si gaar ah looga sheegtay deeq bixiyayaasha taageera barnaamijyada haweenku u yihiin udub dhexaadka. Ka qaygalayaashu waxa ay dareensan yihiin in deeq bixiyayaasha caalamiga ah ay lacagaha siiyaan keliya ururad ay aqoonta u leeyihiin islamarkaana inay adag tahay ururada aan khibradd u lahayn deeq bixiye inuu ka dabaasho codsiyada loo diro, shuruudaha iyo hababkoodaba. Taas lidkeed , ururad qaarkood iskood ayay ula xidhiidheen deeq bixiyayaasha ama waxa ay u sii mareen urur caalami ah oo aan dawli ahayn oo ay iskaashi leeyihiin, kaas oo ay og yihiin inay u fududahay inuu gaadho deeq bixiyaha caalamiga ah. Tani wax ay dhigtay meeqaam ah inay iskaashi la yeeshaan urur aan dawli ahayn oo caalami ah si ay lacag u helaan.

Ka qaygalayaashu waxa ay sheegeen in deeq bixiyayaasha kala duwan ay ku waajibyaan inay yeeshaan khibrad ama xirfado kala duwan oo deeq- bixiye kastaa wuxuu leeyahay shuruudo u gaar ah oo ay waajib tahay in la raaco. Shuruudaha adag ee ay tahay in la buuxiyo ka hor intaan lacagta la helin sida habraacyo culus oo adag oo ay tahay in la raaaco iyo sidoo kale nidaam shariyeed adag oo ay leeyihiin deeq bixiyayaashu, oo tusaale ahaan ay ka mid tahay in ay laga haysto diiwaangellin ama shahaado masuuliyiinta ama ururo caalami ah, ayaa macneheedu yahay in ururada haweenke ee yaryar ama dhex-dhexaadka ah in isla marka u horaysaba laga reebo hanaanka gudbinta codsiyada marshuucyda. Ururada caalamiga ah iyo deeq bixiyayaashu waxa ay leeyihiin nidaamyo qiimayn awoodeed oo mid walba u gaar ah, markaa hadii aad mid ku gudubtid macneheedu maaha in kuwa kale ku aqbalayaan. Qiimanta la sameeyo qaarkood waa kuwo qaallii ah oo waqtii badan qaata. Waa suurtagal ah in nidaamkaasi uu ka-hort istaaggo ururada maxaliga ah ee aan dawligh ahayn inay helaan lacago maadaama oo aanay iska bixin karin qaarashka lagu sameeyo qiimaynta ama aanay haysan shaqaale u gaar ah

oo awood u leh inay qiimaynta sameeyaan. Maadama oo ururada caalamiga ah aanay ka dabo iman baahiyaha horumarinta awoodeed ee ururku leeyahay waxa taas macneheedu yahay in qiimaynta awoodda ururku ay noqoto uun agab heshiiska ka mid ah ee aanay noqon geedi socod mudo dheer jira si loo dhiso bulsho rayid ah oo Somalia leedahay oo xooggan.

Waxa ay sidoo kale sheegeen ka qaybgalayaashu in codsiyada marshuucyada ee la soo bandhigo (calls for proposals) ay inta badan ku xidhan tahay shardi ah in codsiyadu waafaqsan yihiin nooc qaab- dhismeed urur oo cayiman iyo hab maaliyadeed (oo inta badan la mid ah kuwa ururrda caalamig ah) si ay u helaan lacag. Tani waxa ay ku keeentaa daladaha haweenka iyo bulshada rayidka ah iyo dhaq-dhaqaacyada bulsho oo kale in fursadaha ay maalgelin ku helli karaan aay noqdaan cidhiidhi taas oo sida ku riixda in ay iskaashi la yeeshaan urur caalami ah oo aan dawli ahayn. Haseyeeshee, ka qaybgalayaashu waxa ay xuseen in ururada caalamiga ah ee aan dawligha ahayn ay ka maagaan inay iskaashi la yeeshaan ururada maxalliga ah ee aan dawligha ahayn oo waxa aanay kalsooni ku qabin in hay'adaha maxalliga ahi ay awood u leeyihiin inay maamulaan marshuucyo waawayn ama lacago badan ama inay wax ka qabtaan baahida bulshooyinkooda. Haseyeeshee, waxa ay carabka ku adkeeyeen inay iyagu yihiin kuwa u leh fahamka istiraajiga ah duruufaha dalka iyo bulshooyinka ay ula shaqeeyaan sida tooska ah ee aan cidi uga dhowayn; taas oo u awoodsiisa inay fahmaan duruufta ay ku shaqeeyaan; iyo inay metelaan bulshooyinkooda iyo horumarka dalka, halka ururada caalamiga ah ay tahay inay qaataan door taageero.¹⁰

Si wax looga qabto walaas , talo soo jeedimaha waxa ka mid ah in deeq bixiyayaashu ay siyyaan lacag toos ah ururada haweenka iyo ururada bulshada rayidka ah ee ka shaqeeya Soomaaliya, taas oo ay ka mid tahay inay tilmaansan n ama ay mudhaanta siyyaan ururo kala duwan sida daladaha leh qaab dhismeedyad kala duwan iyo shaqsiyadaha qaunuuneed ee kala duwan. Deeq bixiyayaashu waa inay sahlaan hanaanka loogu soo gudbisto codsiyada marshuucyada, qaab qoraalka iyo shuruudaha u dejisan oo ay tahay inay leekaysiyyaan baahiyaha bulshada iyaga oo la tashanaya ururada haweenka iyo ururada bulshada rayidka ah. Waxa ay taasi u baahan tahay in la aqoonsado in ururada haweenka iyo ururada bulshada rayidka ah ay u leeyihiin khibrad iyo aqoon balaadhan duruufaha.

Waxa sidoo kale ah arimo muhiim ah xogta oo la cadeeyo iyo in la baahiyoo hanaanka loo gudbiyo codsiyada marshuucyada, waxyaabaha loo baahan yahay iyo shuruudaha. Baahinta waa in kor loo qaado heer degaan (maamulada xubnaha ka ah dawladda federaalka ah) iyo heer qaran islamarkaana waa inay bartirmaameedsadaan dalladaha ururrada bulshada rayidka ah iyo gudiyada Qaramada Midoobay ee ka dhisan meelaha ka baxsan gobolka Banaadir (Muqdisho). Ka qaybgalayaashu waxa ay xuseen in gudiyada wad shaqayneed (clusters) sidaa Gudida iska kaashada Xadgudbayada ku Saleysan Jinsiga ama Dhowrista waxa ay caadiyan wadaagaan xogta ku saabsana lacagta deeq bixiyaha oo waxa ay ku xayaysiyyaan baraha interneetka (websites). Haseyeeshee, lacagaha 'deeqaha' ah iyo barnaamijyada shaqo oo u habaysan siyaalo kala sooc soocan oo mid waliba gaar u taagan tahay darteed, kuwa la xayaysiyo waxa ay badanka yihiin kuwo ku saabsan ka-hortagga xadgudbyada ku sallaysan jinsiga iyo fal-celintooda, balse kuma jiraan lacago u qoondaysan barnaamijayda Haweenka, Nabadda iyo Amaanka, sida ka-hortagga khilaafka ama ka qaybgalka haweenka. Deeq bixiyayasha waxa lagu dhiirigeliyay inay si xilli hore ah ula wadaagaan xogta marshuucyada codsiyadooda la soo gudbisan karo dalladaha kale ee ka shaqeeya sinaanta jinsiga, ka-hortagga khilaafaaadka, nabadeynta, horumarka iyo 'deeqaha' banii-adantinimo. Deeq bixiyayaashu waa inay bixiyaan ugu yaraan afar todobaad oo ogaysiis ah ka hor xilliga ay dhacayso mudada lagu soo gudbin karo codsiyadu islamarkaana waa in baahinta xogta la sameeyo ka hor daabacaadda.

Si loo daboolo gaabisyada jira ee ku saabsan aqoonta gaarka ah ee ay tahay in loo yeesho nidaamyada u yaal deeq bixiyayaasha, deeq bixiyayaashu waa inay maalgellin ku sameeyaan dadaaladda xoojinta awoodda ururada haweenka iyo ururada bulshada rayidka ah ee ku aadan nidaamyada codsiyada marshuucyada loo gudbiyo, qaab qoraalka degsan (format) iyo nidaamyada maamul ee u yaal deeq bixiyayaasha, iwm (eeg talo soo jeedinta 3 oo ku saabsan xoojinta awoodda). Waxa loo samayn karaa iyada oo casharo lagu bixinayo khadka interneetka

¹⁰ Humanitarian Leadership Academy (2017), 'Dialogue for Action on Aid Localisation in Somalia', May (<https://www.humanitarianleadershipacademy.org/dialogue-action-aid-localisation-somalia/>)

(webiners) si joogto ah ee waa inaanay noqon wax ku xidhiidhsan marshuuc gaar ah oo keliya. Ka qaybgalayaashu waxa ay tilmaameen xaqiiqda ah in caqabadaahaasi ay inta badan sii xoojisay xidhiidhka kala dhhexeeya ururada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah oo u dhigan sidii mid ganacs (transactional), oo waxa loola dhaqmaa [ururada maxalliga ah] inay fuliyaan marshuuc waqtii cayiman leh, halkii laga abuuri lahaa iskaashi mudo dheer ah, sidaasdarteed, hada ma jirto wax maalgellin ah oo lagu sameeyo xoojinta awoodda ay u leeyihiin inay ka dabaashaan shuruudaha deeq bixiye u gaar ah.

Si arrinkan wax looga qabto, ururada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah waa inay xogta ku saabsan fursadaha maalgelineed la wadaagaan ururada ay iskaashiga la leeyihiin si joogto ah iyo si dhaqso ah oo aan waqtigu ka dhicin, iyaga oo aan eegayn inay iskaashi la yeelan doonaan ururada haweenka iyo ururada bulshada rayidka ah. Sidoo kale waa inay siiyaan taageero jooogto ah si ay uga dabaalan karaan habraacyada kakan ee la socda gudbinta codsiyada marshuucyada la baahiyi, inta ay deeq bixiyayaashu ka fudaydinayaan. Geedisocodka la isla qorsheeyo waa in la dejijo oo looga qayb dhigo ururada maxalliga ah si micno leh islamarkaana iskaashi mudo dheer ah waa in la geliyo ururrada maxalliga ah awoodooda si ay qori karaan codsiyada marshuucyada oo ay ugu soo gudbisan karaan si madaax-banaan.

Ugu danbayntii, ka qaybgalayaashu waxa ay xuseen in khadka interneetka oo culus darteed, in la aqbalo in marshuucyda lagu soo gudbiyo farriin ahaan (emails) ama in boostada lagu diro (iyada oo deeq bixiyuhu bixinayo qaraskha boosada) halkii lagu diri lahaa nidaam toos ah oo kakan (online systems).

Cadayamaha gobolada

Ka qaybgalayaasha ka socday ururada haweenka **Banaadir** waxa ay carrabka ku adkeeyeen muhiimadda ay leedahay in hore loo sii ogaado fursadaha, nidaamyada iyo mudnaanaha deeq bixiyaha iwm si ay u heli karaan lacagaha caalamiga ah. Wuxuu ay aaminsan yihiin in deeq bixiyayaasha badankoodu ay door bidaan ururada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah oo si fudud u buuxin kara shuruudaha islamarkaana u leh aqoon nidaamyada iyo hababka lacagaha lagu bixiyo, waxa ay sidoo kale xuseen in qaar badan oo ka mid ah ay ku leeyihiin xurumaha guud ama xafiisyo dalalka bixinaya deeqaha, shabakado wax u fudaydinayo, xidhiidho mudo dheer jiray iyo aqoon joogtaysan oo ku saaban sida loola xidhiidho iyo sida looga helo lacago deeq bixiyayaasha. Waxa ay muujiyeen xaqiiqda ah in ururada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah aqoontooda caalamiga ah, xirfadda iyo khibradd sare ee shaqaalhood iyo nidaamka adag ee isla xisaabtan, hababka maaliyadeeed iyo Kormeerka, Qorshaynta iyo Waxbarashad ay siiso fursad ay kaga horeeyaan ururada maxalliga ah ee aan dawliga ahayn.

Ururrada haweenka/ururrada bulshada rayidka ah ee **Galmudug** waxa ay sheegeen in deeq- bixiyayaasha qaarkood xogta ku aadan marshuucyada la codsan karo ay si toos ah ugu diraan ururrada heer Deegan, kuwaas oo la sii wadaaga kuwa kale. Ka qaybgalayaasha Galmudug waxa ay sidoo kale ka hadleen caqabadaha ka jira xagga xirfadaha farsamo iyo qorista codsiyada marshuucyada, gaar ahaan marka mudada loo gudbinayo deeq bixiyaha ay aad u yar tahay. Tani waxa ay siisaa fursadda keliya ee ah inay iskaashi la yeeshaan ururada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah oo helli kara lacago islamarkaana leh taariikh hore oo ah inay si guul ah u fuliyeen marshuucyo.

Maamul goboleedka **Jubaland** ururada badankoodu waxa ay xuseen in u maraan lacagaha deeq- bixiyayaasha caalamiga ah xidhiidhada lacag ururineed ee heer gobol, gudiyada Qaramada Midoobay (UN clusters) iyo hababka Qaramada Midoobay ee lacag ururinta. Wuxuu intaas dheer, waxa ay sheegeen inay leeyihiin khibrad, xirfad farsamo, taariikh mudo dheer ah oo ay leeyihiin maadama oo ay yihiin ururo bulsho oo heer deegaan ah, iyo inay xidhiidh fiican la leeyihiin bulshooyinka ay la shaqeeyaan, taas oo ka gacan siisay inay ku guulaystaan marshuucyo la soo xayaysiiyay. Haseyeeshee, ka qaybgalayaashu waxa ay isku raaceen in caqabadaha xoogoodu yahay in deeq bixiyayaashu ay codsadaan qaabab mid walba u gaar ah oo kala duwan oo ay doonayaan in loo qoro codsiyada marshuucyada, iyo in welli deeq bixiyayaashu ay siiyan mudnaan ururada caalamiga ah ee aan dawliga ahayn, halkii ay ka doorbidi lahaayeeen ururada aan dawliga ahayn ee maxalliga ah.

Ka qaybgalayaasha ka socday maamul goboleedka **Koonfur-Galbeed** waxa ay isku raaceen in inta badan tartan ka jira dhinaca ururrada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah uu ka dhigo wax adag in si toos ah ay u helaan lacago, qaarkood na waxa ay dareensan yihiin inay weli la hirdamayaan shaqaale la'aan iyo awoodooda farsamo

oo aan fiicnayn marka ay qorayaan codsiyada marshuucyda lagu dalbado ee degdeggaa loo qoro. Ka qaybgalayaashu waxa ay sidoo kale tilmaameen inay caqabad wayn kala kulmaan codsiyada lagu gudbiyo interneetka (online) sida Qorshaha ka Fal-celinta Banii-adantinimada (Humanitarian Response Plan (HRP), oo ay maamusho ha'yadda Qaramada Midoobay ee UNOCHA oo shaqayn waaya marka codsi gudbintu meel muhiim ah marayso.

Talo soo jeedinta 6 – Nidaamyada la raaco/taxadarka:

Deeq bixiyayaasha iyo ururrada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah waa inay yareeyaan oo ay is waafajiyaa shuruudaha digtoonaanta iyaga oo ku sal goynayo nidaamyad digtoonaanta ee ay tahay in la raaco iyo shuruudaha si la jaan qaadi karta tamarta ururada qaran ee bulshada rayidka ah iyo qadarka lacagta la codsanayo, tusaale ahaan ururada haweenka/ururada bulshada rayidka ah waa in lagu soo rogo shuruudo digtoonaan oo ka yar kuwa laga rabo ururada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah ee tartanka kula jira. Deeq bixiyayaashu waa inay maalgeliyaan in la is waafajijo oo mid isku mid ah laga dhigo islamarkaana la dejiyo qiimayn guud oo isku mid ah si loo xaqijiyo in ururada heer deegaan iyo qaran aanay buuxin shuruudo aan dhamaad lahayn oo taxadar. Deeq bixiyayaashu waa inay sidoo kale bixiyaan lacago u saamaxaya ururada haweenka/ururada bulshada rayidka ah inay maalgeliyaan shaqaale leh tamar farsamo oo si fudud uga soo bixi kara shuruudaha taxadar iyo waajibaadka ay tahay in la raaco, gaar ahaan duruufa la mid ah Somalia oo ah meel mudnaanta la siiyay ka-hortagga xagjirka hubaysan iyo istiraajiyadaha la dagaalanka argagixiso ay xanibaad ku yihiin in ururada haweenka/ururada bulshada rayidka ah ay helaan lacago.

Taladan waxa loo soo jeediyay: Deeq bixiyayaasha, hay'adaha dawladaha badani ka tirsan yihiin iyo ururada caalamiga ah ee aan dawliga ahayn.

Shuruudaha digtoonaanta oo ah kuwo adag, xilliga ay tahay in la gudbiyo codsiyada oo kooban, dhokumentiyada loo baahan yahay oo aad u badan, iyo shuruudaha oo ay adag tahay in la buuxiyo sababo la xidhiidho hawl xafiiskeedka oo adag, waxa ay si wayn saamayn ugu yeelan karaan oo ay dib ugu riixi karaan fullinta barnaamijyada banii'adantinimo, nabadeynta, iyo xuquuqaha haweenka iyo hablaha, islamarkaana waxa ay iska hortaagtaa ururada bulshada rayidka ah iyo ururada haweenka inay ka qayb noqdaan marshaariicada ama in loo aqoonsado inay noqdaan kuwo marshaariic lagala shaqayn karo.¹¹ Nidaamka 'deeqaha' ee hada jira waxa la socda shuruudo ah in daneeyaaasha heer qaran iyo kuwa caalamiga ah ay u raacaan si adag xeerarka ku saabsan taxadarka iyo ilaalinta nidaamka. Way kala duwan yihiin oo deeq bixiye kasta mid u gaar ah ayuu leeyahay, halkii ay ka ahaan lahayd in la mideeyo. Soomaaliya maadamama oo mudnaanta la siiyay ka-hortagga xagjirknimada hubayan iyo istiraajiyadaha la dagaalanka argagixisnimada, deeq bixiyayaashu way ka uga adag yihiin marka la barbar dhigo dalalka kale, oo way ka soo taagan yihiin inay si toos ah u siiyaan lacag ururada qaran ee aan dawliga ahayn, taas oo dhigta ururada haweenka iyo ururada bulshada rayidka ah ee Somalia meel nugul.

Deeq bixiyayaasha iyo dawladdu waa inay sameeyan siyaasadda maaraynta khatarta oo lagu maamulo ururadan aan dawliga ahayn ee qaran iyo kuwa caalamiga ah si loo abuuro deegaan awoodsiin leh. Intaas waxa dheer in la dejiyo halbeeg qiimaynta awoddha [ururada] lagu sameeyo oo midaysan si loogu maamulo baadhista awoddha ururada aan dawliga ahayn ee qaran marka ay ka codsadaan lacago deeq bixiyaha, hay'ad Qaramada Midoobay ah, ama urur aan dawli ahayn oo caalami ah. Dhamaan qiimaynada awoodeed iyo hanaanka taxadar ilaalinta waa inay si siman u fuliyaan ururada caalamiga ah ee ka hawlgala Somalia.

Marka la qorshaynayo hababka taxadarka iyo ilaalinta nidaamyada waa in xisaabta lagu darsado in ay xadidan yihiin lacagaha aasaasiga ah iyo shaqaalaha ururrada bulshada iyo rayidka ah ururada haweenku. Maadama oo

¹¹ Inter Agency Standing Committee (2016), 'Donor Conditions and their implications for humanitarian response'
(<https://reliefweb.int/report/world/donor-conditions-and-their-implications-humanitarian-response>)

Iacaguhu ku yar yihiiin, waxa ay ku qasbanyihiin inay kala doortaan inay maalgashadaan shaqaale fulin kara marshuucama shaqaalaha kale ee taageero ahaan muhiimka ah ee ka shaqeeya maaliyadda, ilaalinta waajibaadka, taxarka, warbixinada iwm. Sidoo kale ma haystaan lacag ku fillan oo ay ku qortaan khuburo ka baxsan marka ay marshuuc qoranayaan, sidaasdarteed shaqaalaha u xilsaaran barnaamijayda fulintooda ayaa sidoo kale qora codsiyada marshuucyada, taxadarka ilaalinta nidaamka, diyaarinta miisaaniyadda iwm. Maadaama oo ururada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah ay haystaan lacago ay ku qortaan kuna sii haystaan shaqaale si gaar ah ugu xilsaaran ilaalinta shuruudaha taxadar iyo waajibadka la raaco, ururada bulshada rayidka ah si fudud ayaa garabka loogu dhiftaa marka ay tartan kula galaan marshuuc.

Cadaymaha gobolada

Ka qaybgalayaasha **Banaadir** jooga waxa ay xuseen inay adag yihiiin shuruudaha la raaco ee ay soo bandhigaan deeq bixiyayaashu iyo inay dhib ku tahay badankooda inay diraan dhokumentiyada loo baahan yahay waqtiga oo ku yar darteed, waraaqaha looga baahan yahay oo badan iyo marinada la mariyo oo ah xafiisyo nidaamyo adag.

Maamul goboleedka **Galmudug**, ka qaybgalaashu waxa ay sheegeen in ururadu aanay haysan shaqaale xirfad leh si ay u ilaliyaan nidaamyada taxadar ee looga baahan yahay inay raacaan, islamarkaana inay adag tahay in la fahmo oo la raaco, iyaga oo tilmaamay inay caqabad tahay inaanay xarun guud ama xafiis goboleedyo ku lahayn dalka deeq bixiyaha ah si ay u bartaan oo ay awood ugu yeeshaan inay raacaan shuruudaha faraha badan ee ay leeyihiin deeq bixiyayaashu.

Talo soo jeedinta 7 – Codsiyada marshuucyada (qoraalka farsamo iyo miisaaniyadda):

Deeq bixiyayaashu waa inay dejigan qaab-qoraal (template) oo fudud oo lagu oo gudbin karo codsiyada marshuucyada (proposals) kuwaas oo ay fududahay, laguna dhaqsan karo buuxintiisa, si fudud lagu hello karin afka uu ku qoran yahay, in meelaha lagu baahiyo ay yihiiin kuwo fudud, islamarkaana inay yihiiin kuwo la bedbedelli karo si ay uga turjumaan xuquuqaha haweenka iyo hablaha, ururada haweenka iyo baahiyaha bulshada, iyo sidoo kale inay xidhiidh la leeyihiin istiraajiyadda iyo siyaasadda heer qaran/dal, halkii laga raaci lahaa siyaasadaha iyo mudnaanaha deeq bixiyaha.

Ururrada bulshada rayidka ah iyo ururada haweenku waa inay awood u leeyihiin inay codsiyada marshuucyada ku sallneyaan baahiyaha bulshada ama waa in lagala tashado si loo xaqiijiyo in mashaariicdu ay yihiiin kuwo waafaqsan [baahiyaha bulshada]. Lacagaha loo qoondeeyo ururada qaran waa inay sidoo kale taageeraan hawlaha socda iyo mudnanaha ururada haweenka iyo ururada bulshada rayidka ah. Miisaaniyadu waa inay yihiiin kuwo wax laga bedeli karo si ay ugu ogaalaaaan inay lagu daro qarashyada dheeraadka ah iyo kuwa maamul ee ururada bulshada rayidka ah iyo ururada xuquuqda haweenka.

Taladan waxa loo soo jeediyay: Deeq bixiyayaasha iyo hay'adaha dawladaha badan ku jiraan

Mid ka mid ah caqabadaha u adag ee ay wajahaan ururrada xuquuqda haweenka iyo ururrada bulshada rayidka ah e Soomaaliya waa diyaarinta codsi marshuuc (qoraalka farsamo iyo miisaaniyad ahaanba) oo soo jiita mudnaanaha iyo luqadda deeq bixiyaha, farsamo ahaan saxan, islamarkaana waafaqsan baahiyaha, mudnaanaha iyo siyaasadaha qaran ahaan iyo deegaan ahaan.

Ka qaybgalayaashu waxa ay sheegeen in inta badan codsiyada iyo qoraalada lagu bixiyo oo ku qoran luqad farsamo oo shisheeye, oo u bahan khibrad u gaar ah nidaamka ay ku shaqayso waaxda uu ku saabsan yahay, oo ay la socoto shuruudaha taxadar ee khuseeya, inay keenaan in ururada caalamiga ah ee aan dawliga ahayn loo qaato marshuucama laga dhigo inay iyagu hogaamiyaan, halkii laga qaadan lahaa ururada qaran, deegaan iyo heer maxalli sida ururada xuquuqda haweenka. Sida lacagta loo bixiyo waxa ay muujinaysa in deeq bixiyayaashu

ay door bidaan ururada caalamiga ah ee aanay door bidin ururada qaran ee aan dawlig ahayn, ururada bulshada rayidka ah iyo ururada xuquuqda haweenka.¹²

Marshuucyada la soo bandhigo, lacagaha ama fagaarayashu waa inaanay ku xidhin ururada bulshada rayidka ah iyo ururada xuquuqda haweenka inay iskaashi la yeeshaan ururada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah, taas waxa la samayn karaa iyada oo la fudaydinayo hababka lagu helo lacagaha, iyo in loo qoondeeyo lacago ururada heer deegaan iyo heer qaran, hadii kale waa laga reebayaa lacagaha marka ay gudiyadu qiimaynta sameyaan, kuwaas oo loo arko inay ka turjumayaan dano siyaasadeed oo kala duwan iyo wax is waydaarsi. Arimahaas iyo kuwa la midka ah, ururada aan dawlig ahayn ee caalamiga ah waa inay aqoonsadaan awoodda ay leeyihiin, oo ay qaadaan talaabooyinka daruuriga u ah si loo wareejiyo [awoodda], kuwaas oo ay ka mid yihiin inay qaataan talooyinka ku jira warbixintan maadaama oo ay leeyihiin door laba dhinac ah: deeq -bixiye iyo urur iskaashi leh.

Deeq- bixiyayaashu waa inay kala tashadaan ururrada bulshada rayidka ah/ururrada xuquuqda haweenka ee Soomaaliya nooca lacagaha ee sida ugu fiican u shaqayn karta si wax looga qabto arin gaar ah, iyo in la shaqaynta urur aan dawli ahayn oo caalami ah ay wax ka tari karto, dabadeed la sameeyo qorshaynta iyo baahinta marshuucyada la soo codsan karo. Hadii codsiyada marshuuca ay ku jirto iskaashi, dhex mara urur aan dawli ahayn oo caalami ah iyo ururada bulshada rayidka ah/ururrada xuquuqda haweenka, codsadayaashu waa in la waydiyaa inay si cad u tilmaamaan sida ay u xaqiijinayaan inuu yahay iskaashi la siman yahay, dhamaan wejida marshuuca oo ay ka mid yihiin miisaaniyadda, iyo dhamaan heerarka kala duwan ee go'aan qaadashada, iyo sida ay miisaaniyaddu uga turjumayo arinkaas. Deeq- bixiyayaashu waa inay mudnaanta siyyaan codsiyada marshuuc soo bandhiga iskaashi siman.

Deeq- bixiyayaashu waa inay diyaariyaan qoraalka lagu buuxiyo codsiyada (template) oo fudud oo si dhaqso ah loo buuxin karo, islamarkaana loo turjumay af Soomaali, si fudud loo helli karo marka laga eego dhinaca adayga farsamo ee uu ku qoran yahay/erayo kakan, islamarkaana waa in loo qorsheeyo hanaan ka turjumaya qiimayn lagu sameeyay baahiyaha deeganka iyo siyaasadda dawladaha xubnaha ka ah dawladda federaalka ah iyo ta qaran, iyo sidoo kale mudnaanaha deeq bixiyaha.

Waxa aad muhiim ah in ajendaha Haweenka, Nabadda iyo Amaanka, fursadaha lacagaha iyo mashaariicda la baahiyi in awoodda la isugu geeyo baahiyaha iyo mudnaanaha ururada haweenka iyo hablaha, halkii laga raaci lahaa mudnaanaha deeq bixiyaha. Wuxuu tusaale u ah qaabka sidan loo samayn karo in lala tashado ururada bulshada rayidka ah/ururrada xuquuqda haweenka ka hor intaan la qorin baahinta lagu tilmaamo codsiyad marshuuc ee la xaraysan karo, iyo in la taageero siyaasadaha jira iyo dadaalada barnaamijada. Ka qaybgalayaashu waxa ay sheegeen baahida loo qabo u doodis ku saabsan arimaha Haweenka, Nabadda iyo Amaanka la xidhiidha iyo diyaarinta qorshe hawleed qaran oo ku saabsan Haweenka, Nabadda iyo Amaanka, iyo sidoo kale in lagu daro dastuurka qoondada haweenka iyo in la ansixiyo Xeerka Xadgudubyada Galmada.

Ka qaybgalayaashu waxa ay xuseen in marka ay iskaashi la samaystaan urur aan dawli ahayn oo caalami ah in inta badan aanay gudbin karin codkooda islamarkaana aan codsiyada marshuuca ee la gudbiyo aan la waafajin baahiyaha bulshada. Taas bedelkeeda, ururrada caalamiga ah ee aan dawliga ahayn ayaa go'aan ka gaadha. Ururrada maxalliga ah waxa ay dareensan yihiin in fariimahooda oo ay sii dhex mariyan "ururada caalamiga ah" ay ka qaado fursaddii ay ku sharixi lahaayeen baahiyooda lacageed, taas oo sababta in wada shaqayntu burburto. Wuxuu intaas dheer, inaan ururada maxalliga ah haysan lacago ay ku daboolaan qarashaadka dheeraadka ah iyo kuwa maamul.

Deeq- bixiyayaashu waa inay sidoo kale u debecsanadaan qadarka lacagta ay bixinayaan oo ay aqbalaan inay wadaagi karaan ururada bulshada rayidka ah/ururrada xuquuqda haweenka oo kala duwan, maadama oo lacagta badan ay ka reebto ururada bulshada rayidka ah/ururrada xuquuqda haweenka inay codsi soo gudbistaan. In loo qaabeeyo tan si ku dhisan cabirka ururada xuquuqda haweenka waxa ay u ogolaanaysaa in qaar badani ay heli karaan lacago. Hab kale oo lagu taageeri karo ururada xuquuqda haweenku waa in la siiyo deeqo kooban (small

¹² Local to Global Action (2019), 'Funding to local actors still far from Grand Bargain Commitments' (<https://www.local2global.info/research/the-humanitarian-economy/gb19>)

grants) iyo lacago aan xadidnayn oo kor u qaada raadaynta is-bedel ee ku yimaadda duruuf gaar ah iyo sii waaritaankeeda.

Miisaaniyaddu waa inay tahay mid la bedbedelli karo si ay ugu ogolaato inay ku darsadaan qarashaadka dheeraadka ah iyo maamul ururada bulshada rayidka ah iyo ururada xuquuqda haweenka. Waa inay sidoo kale xisaabta ku darsadaan oo ay ka-hortagaan in marar badan ururada bulshada rayidka ah iyo ururada xuquuqda haweenka la waydiisto inay qabtaan wax ka badan inta ay u saamaxayo lacagta ay heleen, iyo caqabadaha amaan iyo hawlgal ee ay wajahaan. Waxa muhiim ah in deeq -bixiyuhu ka fekero ilaa xadka ay u qaabayn karaan shuruudaha iyo nidaamyada lacageed ee ay leeyihiin si ay ugu saamaxdo ururada xuquuqda haweenka iyo ururada bulshada rayidka ah inay hawlaha ku qabtaan miisaaniyad u ogolaanaysa inay u shaqeeyaan si xaq ah, waaraysa oo mudo dheer ah. Marka ay iskaashiga la yeelanayaan ururada bulshada rayidka ah/ururada xuquuqda haweenka, ururada caalamiga ah ee aan dawliga ahayn waa inay xaqiijiyaan in [ururada maxaliga ah] ay helaan miisaaniyadda badankeeda ama ugu yaraan miisaaniyad ku filan si a u xaqiijiyaan inaanay hawl badan ku daallin ee ay horumariyaan dhismaha ururka.

Cadaymaha gobolada

Inta badan ururada **Banaadir** waxa ay xuseen in halka ay ugu liitaan tahay gaabis ku jira awoodda marka ay noqoto qorista marshuucyada. Ururada qaarkood waxa ay tilmaameen walaac ay ka qabaan luqadda farsamo oo caqabad ah gaar ahaan marka erayo farsamo ama erayo cilmi ahaan kakan oo ay adag tahay in loo turjumo duruufta dalka ay isticmaalaan deeq bixiyayaashu. Tan waa in la fudaydiyo si loogu fahmo si fudud.

Maamul goboleedka **Hirshabeelle**, ka qaybgalayaashu waxa ay tilmaameen in arinka u wayn ee ay walaaca ka qabaan uu yahay gaabis ku jira awoodda ay u leeyihiin inay qoraan codsi marshuuc (proposal).

Ka qaybgalayasha ka socday maamul goboleedka **Puntland** waxa ay soo jeediyeen fal-celin isku jirta, halka qaarkood ay ka tilmaameen caqabado marka ay noqoto qorista codsiyada marshuucyada maadama oo anay haysan shaqaale leh awood farsamo, kuwa kale waxa ay qabeen feker ka duwan oo waxa ay haystaan shaqaale ku filan oo leh xirfad farsamo oo waxa ay awood fiican u leeyihiin inay qoraan codsiyo marshuuc. Kuwan danbe waa kuwa awoodoodu ay kortay mudo dheer gaar ahaan codsi qorista oo ay la sameyeen ururada caalamiga ah ee ay iskaashiga la leeyihiin, taas oo cadayn u ah muhiimadda ay leeyihiin iskaashiga iyo wada shaqaynta muda dheer socota.

Ka qaybgalayaasha maamul goboleedka **Galmudug** waxa ay tilmaameen inaanay haysan shaqaale xirfad leh iyo/ama miisaaniyad ay ku qortaan khubro qorta codsiyada marshuucyad maadama oo anaay haysan shaqaale farsamo. Qoraalada u diyaarsan in lagu buuxiyo codsiyada marshuucyada ee ay leeyihin deeq bixiyayaasha iyo cidaha ay iskaashiga leeyihiin waxa ay u baahan yihii khibrad farsamo.

Ka qaybgalayaasha maamul goboleedka **Jubaland** waxa ay tilmaameen in qoraaladda lagu buuxiyo codsiyada marshuucyadu ee ay deeq -bixiyayaashu leeyihiin ay yihii kuwo erayada lagu qori karo ay xadidan yihii taas oo ka dhigta wax adag in lagu faah-faahiyo baahiyaha bulshada. Waxa intaas dheer, in lacagaha la siiyo ururada maxalliga ah ay yihii kuwo xadidan xitaa marka hawlaha la qabanayaay ay yihii kuwo balaadhan.

Talo soo jeedinta 8 – Kormeer, Qiimaynta iyo Barasho (MEL):

Deeq bixiyayaasha iyo ururada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah waa inay mudnaanta siiyan in shaqaalaha Kormeerka, Qiimaynta iyo Waxbarashada ee ururada bulshada rayidka ah iyo ururada xuquuqda haweenku ay yeesaan shaqooyin muhiim ah oo joogtayn, balse aanay noqon jago “marshuucaysan” oo inta marshuuco socdo keliya jirta, sidoo kale waa inay xoojiyaan awoodda shaqaalaha Kormeerka, Qiimaynta iyo barashada guud ahaan, balse aanay ka taageerin uun ururinta iyo lafo-gurista xogta si ku salaysan agabka iyo hababka deeq bixiyayaasha iyo ururada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah.

Waa in mudnaanta la siiyo hababka ururuada bulshada rayidka ah/ururada xuquuqda haweenka ee hore loo dejiyay islamarkaana hababka cusub waa in lala diyaariyo ururada bulshada rayidka ah/ururada xuquuqda haweenka. Waxbarashada ku saabsan sida loo isticmaalo xogta Kormeerka, Qiimaynta iyo Waxbarashada ee qorshaynta barnaamijyada waa arin ururada bulshada rayidka ah ay uga baahan yihiin tageero iyo khayraad dheeraad ah.

Kormeerka, Qiimaynta iyo barashadu waa inay waafaqsan tahay siyaasadaha/nidaamyada dawladda marka la waafajinayo ujeedooyinka ururada xuquuqda haweenka/ururada bulshada rayidka ah iyo baahiyaha bulshada, islamarkaana waa in lagu fuliyo hanaan loo dhan yahay oo ay qayb ka yihiin dadka shacabka ah ee loo faa'iidaynayo iyo ka qaybgalayaasha barnaamijka. Wuxuu sidoo kale loo baahan yahay lacago la bedbedelli karo oo loogu talo galo qorshaha marka xaalku is bedello u diyaarsan ee xaaladaha degdega ah, sida COVID-19 oo lagu xidhiidhsiiyo dadaalada iyo lafo-gurka Kormeerka, Qiimaynta iyo Waxbarashada.

Taladan waxa loo soo jeediyyay: Deeq bixiyayaasha, dawlada, hay'adaha dawlada badan ay ku jiraan, ururada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah iyo bulshada rayidka ah.

Inta badan ka qaybgalayashu wuxuu ay xuseen inay leeyihii unug u qaabilsan Kormeerka, Qiimaynta iyo barashada, balse halkii ay ka samaysan lahaayeen nidaamyo, habab iyo shuruudo u gaar ah, wuxuu ay awoodda saaraan inay buuxiyaan shuruudaha deeq bixiyaha iyo cidda ay iskaashiga la leeyihii. Wuxuu sidoo kale sheegeen in inta badan ururada bulshada rayidka ah aanay ku darin miisaaniyadda marshuuc qarashka Kormeerka, Qiimaynta iyo barashada, sababta oo ah ururada caalamiga ah ee ay iskaashiga leeyihii badankoodu wuxuu ay mudnaanta siiyan shaqadooda iyo unugooda Kormeerka, Qiimaynta iyo barashada, taas oo keenta in nidaamyada Kormeerka, Qiimaynta iyo barashada ee ururada bulshada rayidka ah uu noqdo mid liita.

Ururada ka qaybgalay wuxuu ay sheegeen in aanay lahayn shaqaalo leh xirfad farsamo oo la xidhiidha Kormeerka, Qiimaynta iyo barashada, lacag la'aan darteed, islamarkaana inay codsadeen in la xoojiyo awoododa Kormeerka, Qiimaynta iyo barashada. Sidaas darteed, ururada xuquuqda haweenka iyo ururada bulshada rayidka ah ee heer deegan waa inay deeq bixiyayaasha iyo ururada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah ka taageeraan maaliyad ahaan shaqaalaha Kormeerka, Qiimaynta iyo barashada oo noqdo kuwo joogtaysan ee aan ku xidhiidhsanayn marshuuc gaar ah. Waa inay si dhow ula shaqeeyaan unugyada kale gaar ahaan unuga qorshaynta barnaamijyada, sidoo kale waa in loo dejiyo hab laga wada qayb qaataay nidaamka Kormeerka, Qiimaynta iyo barashada.

Deeq -bixiyayaasha iyo ururada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah waa inay mudnaanta siiyan hababka hore u sii dejisan ee Kormeerka, Qiimaynta iyo barashada ee ay leeyihin ururada bulshada rayidka ah/ururada xuquuqda haweenka, halkii ay ku soo rogi lahaayeen nidaamkooda Kormeerka, Qiimaynta iyo Waxbarashada. Hadii ururada bulshada rayidka ah/ururada xuquuqda haweenku aanay hore u lahayn nidaamka Kormeerka, Qiimaynta iyo barashada, deeq bixiyayaasha waa inay xisaabta ku darsadaan inay dejyaan oo ay ula qorsheeyaan si wada jir ah ururada bulshada rayidka ah/ururada xuquuqda haweenka, iyada oo lagu salaynayo qaabka ay ururada bulshada rayidka ah iyo bulshooyinku u kormeeraan dadaaladooda (taas oo hadii ay doonto aan ahayn barnaamij ama marshuuc) iyo inay qaataan nidaamkaas jira halkii ay caksigeeda noqon lahayd. Tani wuxuu ay si gaar ah muhiim u tahay dal sida Soomaalyia oo kale ah oo deeq- bixiyayaal aad u yar laga helli karo

ama ay joogaan islamarkaana bartilmaameedku yahay isla xisaabtan loo marayo nidaamka Kormeerka, Qiimaynta iyo barashada oo fogaan ka maamul ah (remote MEL). Taageero la siiyo awoodda Kormeerka, Qiimaynta iyo barashada ee ururada xuquuqda haweenka iyo ururada bulshada rayidka ah waxa ay ka qayb qaadan lahayd in la dhiso aaminaad iyo kalsooni, meel hellidda deeq bixiyayaasha iyo ururada caalamiga ah ee aan dawligh ahayn ay xadijan tahay.

Kormeerka, Qiimaynta iyo barashadu waa inay leeyihii tuseyaal (indicators) waafaqsan Qorshe Qaran ee Horumarka nidaamkiisa Qiimaynta iyo sidoo kale tilmaamayaashaa iyo bartilmaameedyada deegaamaynta Ajandaha 2030.

Iyada oo inta badan ka qaybgalayaashu ay xuseen inay isticmaalaan agabyada Kormeerka, Qiimaynta iyo barashada si ay u raacaan shuruudaha deeq bixiyaha, waxa ay sidoo kale sheegeen inay tahay in xoogga la saaro qaybta waxbarashada si ay u horumarin karaan barnaamijyada iyo sidoo kale inay wax ka bartaan ururada kale ee bulshada rayidka ah.

Cadaymaha gobolada

Ka qaybgalayaasha joogay **Banaadir** waxa ay xuseen inay leeyihii nidaamka Kormeerka, Qiimaynta iyo arashada, balse inta badan waxa qeexay cidda ay iskaashiga la leeyihii (ururada aan dawligh ahayn ee caalamiga ah) islamarkaana waxa ay waafaqsan tahay shuruudaha deeq- bixiyaha. Waa muhiim in tiigelin la siiyo sidii loo waafajin lahaa kuwa dawladda (heer qaran iyo heir maamul goboleed) iyada oo laga dheeganayo Siyaasadda Dawladda ee Kormeerka iyo Qiimaynta.¹³ Shaqaalah Kormeerka, Qiimaynta iyo barashada waxa caadiyan taageera ururada aan dawligh ahayn ee caalamiga ah ee ay iskaashiga la leeyihii islamarkaana ururada maxalliga ah waa inay soo ururiyaan xogta si loo qiimeeyo horumarka uu sameeyey marshuuc/barnaamijku. Warbixinta ka dhalata waxa kadib la wadaagaan cidda iskaashiga la leeyihii (ururada aan dawligh ahayn ee caalamiga ah), qaarkood waxa ay ku qoraan barta uu interneetka uu ku leeyahay ururka bulshada raydka ah ama bogga Facebook ga. Qaar ka mid ah ka qaybgalayashu waxa ay xuseen inay jiraan gaabis ku jira shaqaalah Kormeerka, Qiimaynta iyo barashada, oo ay codsadeen in la xoojiyo awoodooda ku aadan arinkas oo ka baxsan xog ururin iyo inay diyaariyaan warbixin ku dhisan agabka deeq urur aan dawligh ahayn oo caalami ah am deeq bixiye gaara ah.

Ka qaybgalayaasha ka socday **Galmudug** waxa ay sheegeen inaanay lahayn shaqaale u xilsaaran Kormeerka, Qiimaynta iyo barashada miisaniyad la'aan darteed. Waxa ay carabka ku adkeeyeen in baahida ay u qabaan shaqaale Kormeerka, Qiimaynta iyo barashada ah si ay u aqoonsadaan, qiimeeyaan hawlgudashada guud islamarkaana ay u qiimeeyaan saameynat, gaar ahaan kuwa khuseeya xuquuqaha haweenka. Waxa intas dheer, hadii kormeer joogto ah (todobaadkii, labadii todobaad mar, bishishii mar iwm) ay sameeyan shaqaalahau ururku; ururada aan dawligh ahayn ee caalamiga ah ayaa sameeya mudo xilliyaysan (labadii bil mar, afar bilood imw) iyaga oo isticmaalaya agabkooda u gaarka iyo iyaga oo aan raacin xogta ay soo ururiyeen ururada bulshada rayidka ah. Xogta ayaa kadib lala wadaagga ururada bulshada rayidka ah. Tan waa in lidkeed la sameeyo si dhamaam kormeerka ay u sameeyaan ururada bulshada rayidka ah oo isticmaalaya agabkooda u gaarka iyo iyo fagaarahooda islamarkaana kadib inay la wadaagaan ururada aan dawligh ahayn ee caalamiga ah. Ka qaybgale kale oo la duruuf ah ayaa sheegay inaanay haysan miisaaniyad ay ku qortaan shaqaalah Kormeerka, Qiimaynta iyo barashada. Tani waxa ay saamayn ku leedahay madax-banaanida iyo dhex-dhexaadnimada hawsha kormeerka ay sameeyaan isla shaqaalah fulinaya marshuuca, sidoo kale waxa ay curyaaminaysaa barnaamij dejinta ku dhisan barashada iyo cadaymaha.

Ka qaybgalayaasha **Hirshabeelle** waxa ay tilmaameen inay leeyihii unug u xilsaaran Kormeerka, Qiimaynta iyo barashada iyo shaqaale fuliya hawlaho Kormeerka, Qiimaynta iyo barashada, balse inay la kulmaan caqabado ay sababeen gaabis ku jira xagga xirfadda ku saabsan arimaha farsamo ee Kormeerka, Qiimaynta iyo barashada.

Ka qaybgalayaasha maamul goboleedka **Jubaland** waxa ay xuseen inuu jiro unugga Kormeerka, Qiimaynta iyo barashada oo leh shaqaale caadiyan isticmaala agabyo si ay u fuliyaan kormeer gudaha ah oo ay shardi ka

¹³ The Ministry of Planning, Investment and Economic Development (2019), 'Somalia National Development Plan 2020 to 2024', December (<https://mop.gov.so/index.php/ndp/somali-national-development-plan/>)

dhigeeen samayntooda ciddaha iskaashiga lala leeyahay iyo deeq bixiyayaashu. Waxa intaas dheer, in mid ka mid ah ka qaybgalayaashu uu xusay inay qayb ka tahay brashadu si ay u qorsheeyaan mashaariicda. Ka qayb kale waxa uu sheegay inay diyaariyeen qoraal diyaarsan oo lagu buuxin karo qiimaynta oo ay iska kaashadeen Wasaaradda Dumarka iyo Xuquuqal Insaanka ee maamul goboleedka. Inta badan ururada ka jira maamul goboleedku ma laha gaabis la xidhiidha Kormeerka, Qiimaynta iyo barashada si la mid ah maamul goboleedyada kale.

Ka qaybgalayaasha maamul goboleedka **Puntland** waxa ay sheegeen inay leeyihii unuga Kormeerka, Qiimaynta iyo barashada oo ay isticmaalaan qoraal diyaarsan oo ay sameeyeen cidda ay iskaashiga la leeyihii si ay u fuliyaan kormeer gudaha ah iyada oo inta u yar ay sameeyaan khuburo debeedeed. Mid ka mid ah ka qaybgalayaasha ayaa tilmaamay in cidda [ururada caalamig ah] ay iskaashiga la leeyihii ay isticmaasho mararka qaar cid sadexaad oo samaysa kormeerka si ay u qiimayso hawlaha barnaamijyada iyo in la raacay Kormeerka, Qiimaynta iyo barashada. Mid ka mid ah ka qaybgalayaasha o ka shaqeeya fullinta barnaamij ku saabsan nabadeynta ayaa xusay muhiimadda ay u leedahay barnaamijka hanaanka waxbarasho.

Ka qaybgalayaasha ka socday maamul goboleedka **Koonfur-Galbeed** ayaa leh awoodda ugu xoogan ee Kormeerka, Qiimaynta iyo barashada, taas oo aan la yaab Lahayn Sababta oo ah badankoodu waa ururo waawayn oo saldhigoodu yahay Muqdisho. Ka qaybgalayaashu waxa ay sheegeen inay leeyihii unugyada Kormeerka, Qiimaynta iyo barashada oo leh shaqaale aqoon leh iyo waxbarasho laga qaybgeliyo. Mid ka mid ah ururada iskaashiga la leh ururada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah ayaa sameeya laba nooc oo barasho ah: heer gobol iyo heer qaran sanadkii ba. Ka hore waa heer gobol oo waxa isugu yimaadda daneeyayaal ka socda dalal kala duwan oo waxa lagu soo bandhiga waxa lagu guulaystay iyo waxa aan lagu guulaysan, waxa isku midka laga yahay iyo waxa lagu kala duwan yahay, gaabisyada iyo sida looga bixi karo. Ka labaad waa mid heer qaran oo ay waxbarasho oo ay isugu yimaadaan daneeyayaashu. Inta lagu gudo jiro, waxa ay ka wada hadlaan guulaha heer qaran iyo gobol ee la gaadhad, waxa lagu kala duwan yahay iyo wax isku midka laga yahay iyo gaabisyada la tilmaamay iyo sida looga bixi karo iyada oo la isticmaalayo miisaaniyadda iyo hawlaha la qorsheeyey. Kullanad waxbarasho waxa ay ururada bulshada rayidka ah ku wadaagan xog islamarkaana waxbay ka bartaan daneeyayaasha. Tusaale ahaan, inkasta oo aanay haysan miisaaniyad ay kaga fal-celiyaan COVID-19, kulanadaas waxbarasho dartood, waxa jiray qorshe diyaar garow oo loo isticmaalay si loo xakameeyo. Mid ka mid ah ka qaybgalayaashu waxa uu sheegay inay kormeerada si wada jir ah ula sameeyaan daneeyayaasha kale sida dawladda iyo cidaha ay iskaashiga la leeyihin.

Talo soo jeedinta 9 – Warbixinada (maaliyadeed iyo farsamo (financial and narrative):

Deeqbixiyayaasha iyo ururrada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah waa inay diyaariyaan qaabab loo qoro iyo nidaamyo halbeeg isku mid ah (maaliyad iyo farsamo) oo la heli karo, daah-furan, degdeg ah oo qoraalada la gudbinayo ay yar yihiin. Deeq- bixiyayaasha iyo ururada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah waa inay ka fekeraan in laga guuro warbixinada bilaha ah, oo loo guuro warbixino labadii sanadood hal mar ah ama sandkii mar ah. Warbixinada qaabka loo dirayo sidoo kale waa la fudaydin karaa hadii loo gudbiyo hanaan aan rasmi ahayn sida telefoonada, shirar ama booqashooyin.

Deeq bixiyayaasha iyo ururada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah waa inay taageero ku siiyaan cidda ay iskaashiga la leeyihiin iyaga oo ku siinaya tabobar shuruudaha warbixinneed iyo habraacyada deeq bixiyaha.

Taladan waxa loo soo jeediay: Deeq bixiyayaasha, dawladaha, hay'adaha dawladaha badan ay ku jiraan iyo ururada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah.

Ururada bulshada rayidka ah/ururrada xuquuqda haweenka waxa ku waajib ah inay warbixinno u diraan ururka aan dawliga ahayn ee caalamiga ah ee ay iskaashiga la leeyihiin iyo deeq bixiyaha, taas oo xogta ka dhigta mid lagu celceliyay islamarkaana ku abuurta culays ururada heer deegaan iyo qaran, sida ay sheegeen ururo kala duwan oo ka socday maamul goboleedyo kala duwan iyo Banaadir. Ka qaybgalayaashu waxa ay sheegeen in deeq- bixiyayaasha iyo cidha iskaashiga lala leeyahay ay tahay in ay siiyaan taageero, ay ka mid tahay mid maaliyadeed, shaqaalaha oo lagu tabobaro shuruudaha warbixinneed iyo habraacyada deeq bixiyaha. Waxa baahi loo qabaa in laga dhigo warbixinaha kuwo la heli karo, daah-furan oo mudada la qorayo aanay waqtii badan qaadan. Warbixinada farsamo (narrative) waa inay koobnaadaan (ugu badnaan 4 bog) oo ay jiraan waxyaabaha muhiimka ah ee warbixinta lagu qorayo ee ay ka midka yihiin hawlaha la qabtay, miro-dhalka, saameynta iyo caqabadaha. Warbixinista farsamo waa inay kala qaybsan tahay oo ku sar go'an tahay miisaaniyadda iyada oo sharaxaad looga baahan yahay oo keliya is-bedelka ka badan 20% miisaaniyadii dejisnayd. Qaan sheeg (receipt) waa in loo baahdo oo keliya qarashkii ka badan £200. Tani waxa ay si wayn hoos ugu dhigaysaa culayska maamul ee haysta ururada xuquuqda haweenka iyo inay dhisto xidhiidh lala yeesho deeq bixiyaha oo ku dhisan aaminaad. Tani waxa ay u ogolaanaysa ururada bulshada rayidka ah inay geliyaan waqtigooda gaadhista ujeedooyinkooda halkii ay awoodda saari lahaayeen shuruudo maamul/raacintaan/warbixiineed oo meesha ka saari kara 'shaqadooda aasaasiga ah.' Mudada warbixinada lagu soo gudbinayo waa inay noqoto mid kala fog oo la codsado sanadkii hal mar (ugu badnaan 6 bilood hal mar).

Cadaymaha gobolada

Ka qaybgalayaasha ka socday **Banaadir** waxa ay sheegeen in hababka hada warbixinad loo gudbiyo ay yihiin kuwo adag, iyo inay fiicnaan lahayd hadii la yareeyo waraaqaha loo baahan yahay in la gudbiyo, in laga dhigo warbixinta kuwo si sahlan loo diro karo oo kooban, iyada oo aan laga tegay in si cad wax loo tilmaamo marka ay noqoto faah-faahinta. Mid ka mid ah ka qaybgalayaasha wuxuu sheegay inay fiicnaan lahayd hadii deeq bixiyayaashu ay taageeraan in warbixinada iyo waxyaalaha la daabaco lagu turjumo af Ingiriisi iyo Soomali si ay u gaadho dad badan. Ka qaybgalayaashu waxa ay sidoo kale xuseen in warbixinada bilaha ah qoristoodu ay tahay arin waqtii badan qaadata, oo waxa ay soo jeediyeen in warbixinada laga dhigo mid afar bilood leh ah, labadii sanadood mar iyo sanadkii mar.

Ka qaybgalayaasha ka socday maamul goboleedka **Jubaland** waxa ay codsadeen in warbixinada maaliyadeed iyo farsamo laga dhigo kuwo si sahlan loogu diri karo, oo aay ku yar yihiin waraaqaha loo baahan yahay. Sidoo kale waxa ay codsadeen in awoodda shaqaalaha ee warbixin qorista kor loo qaado. Mid ka mid ah ka qaybgalayaashu waxa uu tilmaamay in warbixinada maaliyadeed ee Qaramada Midoobay loo dirbido maadama oo ay yar yihiin waraaqaha la diro, ay waxtar leeyihiin islamarkaana nuxurka lagu qorayo ay kooban yihiin, halka taas bedelkeeda nidaamka USAID iyo EC ay yihiin kuwo adag oo u baahan dhokumentiyo aad u badan.

Ka qaybgalayaasha ka socday maamul goboleedka **Koonfur-Galbeed** waxa ay xuseen in qaabka loogu qoro warbixinada deeq bixiyayaasha iyo cidha kale ee iskaashiga lala leeyahay ay kala duwan yihiin xitaa marshuuc

isku mid ah oo ay kakan yihii. Wuxuu ay soo jeediyeen in la is waafajiyo qaababka warbixinada loo qoro oo laga dhigo hal qaab oo halbeeg la wada raaco leh oo la isticmaali karo, hada waxaa la isticmaalaa qaabab kala duwan oo keenay in xog isku mid ah lagu kala qoro laba warbixinood. Mid ka mid ah ka qaybgalayaashu waxa uu ku taliyay in lagu siiyo tabobar shaqaalaha ururada bulshada rayidka ah shuruudaha iyo habraacyada warbixinneed ee cidha ay iskaashiga la leeyihiin.

Ka qaybgalayasha maamul goboleedka **Puntland** waxa ay codsadeen tabobar ku saabsan shuruudaha iyo habraacyada warbixinneed. Mid ka mid ah ka qaybgalayaashu waxa uu ku taliyay in warbixinadu si ay u sahlanaadaan la isticmaalo nidaam kambatuurka ku dhisan (computerised online system) oo loo isticmaalo warbixinada farsamo iyo kuwa maaliyadeed labadaba. Intaas waxa dheer inay ku taliyeen in deeq bixiyayaasha iyo ururada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah inay dejiyaan qaab loo qoro warbixinada si looga dhig wax si fudud lagu helli karo islamarkaana u fahmi karaan ururada heer deegaan ee bulshada rayidka ah iyo ururada xuquuqda haweenka.

Ka qaybgalayasha ka socday maamul goboleedka **Galmudug** waxa ay sheegeen in deeq- bixiyayasha iyo cidha iskaashiga lala leeyahay ay dejiyaan nidaam interneetka ah (online) oo si xillile ah loogu diro warbixinada. Si taas la mid ah, ka qaybgalayasha **Hirshabeelle** waxa ay sheegeen inay jirto baahi loo qabo nidaam interneetka ah (online) oo warbixinada loogu diro deeq bixiyayaasha iyo cidha iskaashiga lala leeyahay, balse marka la diyaariyo waa in lagu tabobaro habka cusub shaqaalaha ururada bulshada rayidka ah/ururad xuquuqda haweenka.

Cidaha iskaashiga leh (Partners)

Somali Women Development Center (SWDC) Xarunta Horumarinta Haweenka Soomaaliyeed (Somali Women Development Center) – oo loo soo gaabiyo SWDC – waa urur aan dawli ahayn oo aan wax faa'iido ah doonayn, oo la aasaasay badhtamihi 2000. Tan iyo markaas, SWDC waxa uu la shaqeeyey ururo uu iskaashi la leeyahay oo badan, deeq bixiyaaal iyo dawlado oo ay ka mid yihiin hay'adaha Qaramada Midobay, iyo ururo caalami ah, waxa uu u taagan yahay inuu fuliyo barnaamijyo iyo hawlo kobciya in haweenka iyo habluhu ay helaan xuquuq si loo xaqiijiyo inay ku yeeshaan door firfircooni bulshada Soomaaliyeed iyada oo la kobcinayo ka qaybgalkooda bulsho, siyaasadeed, dhaqaale iyo dhaqan.

Saferworld waa urur caalami ah oo madax-banaan oo ka shaqeeya ka-hortagga khilaafyada iyo dhisidda nolol badqabta. Wuxuu aannu la shaqaynaa bulshooyinka ay saameeyeen khilaafyadu si aay u kobciyaan badqabkooda iyo dareenkooda amni, islamarkaana waxa ay samaysaa cilmi baadhis iyo lafo-guris baladhaan. Wuxuu aay u isticmaashaa cadaymahaas in lagu horumariyo siyaasadaha iyo dhaqamada deegaan, qaran iyo caalamiba ee gacan ka gaysan kara dhisidda nabad waarta. Mudnaanta waxa ay siisaa dadka – waxa ay aaminsantahay aduun qof waliba uu ku noolaan karo nolol nabad ah oo guul leh, oo xor ka ah cabsi iyo ammaan darro. Saferworld Waa urur aan faa'iido doon ahayn oo ka shaqeeya 12 dal iyo geyi ku kala yaalla Afrika, Aasiya, iyo Bariga Dhexe.

Gender Action for Peace Security (GAPS) Ururka Hawlgalka Jinsiga ee Nabadda iyo Ammaanka (GAPS) waa daladda bulshada rayidka ah ee Ingiriiska ee ka shaqeeya arimaha Haweenka, Nabadda iyo Amaanka. Wuxuu ka ah ururo aan dawli ahayn oo ka shaqeeya horumarka, xuquuqal insaanka, caawimada banii'adantinimo iyo nabad dhisidda. Wuxuu loo aasaasay si uu u kobciyo Haweenka, Nabadda iyo Amaanka, oo ay ka mid tahay Qaraarka Golaha Amaanka ee Qaramada Midoobay ee tirsigiisu yahay 1325. GAPS waxa ay kobcisaa oo ay ku xisaabisaa Dawladda Ingiriiska ballan qaadyada caalamiga ah ee ay u qaaday haweenka iyo hablaha ku nool meelaha khilaafyadu ka jiraan ee dunida oo dhan.